



MAAMULKA SSC-KHAATUMO XAFIISKA MAALIYADDA

Xeerka

Maamulka Guud ee Maaliyadda

Xeer Lr. 1/2023

Laascaanood
Diseembar 2023

Maamulka SSC-Khaatumo
Xafiiska
Guddoomiyaha Golaha Dhexe



إدارة اس اس سي خاتومو
مكتب
رئيس المجلس المركزي

SSC-Khatumo Administration
Office of the Chairman
The Central Council

SUMMAD: GDH/XG/009/122023

Tr: 9/12/2023

Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Maamulka Guud ee Maaliyadda ee Maamulka SSC-Khaatumo

Golaha Dhexe ee Maamulka SSC-Khaatumo;

Markuu arkay soo gudbinta Golaha Fulinta ee Maamulka SSC-Khaatumo ee Hindishe Sharciyeed Maamulka Guud ee Maaliyadda;

Markuu arkay baahida degdega ah ee loo qabo xeer lagu maamulo hawlaha maaliyadda ee Maamulka SSC-Khaatumo;

Markuu arkay Qodobka 8aad farqadiisa 2-aad ee Axdiga Maamulka SSC-Khaatumo ee awooda sharci dejinta u xilsaaray Golaha Dhexe ee Maamulka SSC-Khaatumo;

Markuu dooda qotada dheer ee Xubnaha Golaha Dhexe ka yeesheen Xeerkan, lana marsiiyey habraaca xeer dejinta sida uu dhigayo Xeer Hoosaadka Golaha Dhexe;

Markuu arkay ansixinta Golaha Dhexe ee Hindise Sharciyeedka oo qabsoontay markay Taariikhdu ahayd 9/12/2023

Waaxa uu halkan ugu soo gudbinayaa Hogaamiyaha Golaha Fulinta ee Maamulka SSC-Khaatumo ansixinta Xeerka Maamulka Guud ee Maaliyadda Xeer Lr. 1/2023 si uu uga guto waajibaadkiisa ku dhigan Axdiga Maamulka SSC-Khaatumo.

Guddoomiyaha Golaha Dhexe

Xoghayaha Guud ee Golaha Dhexe

Mudane Jaamac Yaasiin Warsame

Cabdilaahi Cabdiraxmaan Maxamed

.....

.....

QAYBTA 1:

QODOBADDA GUUD

Qodobka 1:

Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa “**Xeerka Maamulka Guud ee Maaliyada Maamulka SSC-Khaatumo**” (Xeer Lr: 1/2023).

Qodobka 2:

Ujeedooyinka Xeerka

1. Ujeedada Xeerkaani waa maamulka dhammaan arrimaha la xiriira maareynta Maaliyadda Guud ee Maamulka SSC-Khaatumo.
2. Wuxuuna dejinayaa mabaadi’ida asaasiga iyo habraacyada diyaarinta, ansaxinta, iyo fullinta Miisaaniyadda Maamulka, kormeerka gudaha, xisaabaadka, warbixinnada iyo dabagalka dakhliga, kharajka, rasumaalka iyo deymaha, deeqaha iyo kabista sidoo kale maareynta deynta guud iyo damaanadaha Maamulka.
3. Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa Hay’adaha Maamulka SSC-Khaatumo iyo Shirkadaha Maamulku leedahay.
4. Xeerkan waxaa looga gol-leeyahay; in la sameeyo nidaam cad oo lagu maamulo Maaliyada Maamulka si loo hubiyo isla xisaabtan dhamaystiran, isla markaana loo sharciyeeyo qaabka ugu haboon ee diyaarinta iyo isticmaalka Miisaaniyada Maamulka SSC-Khaatumo.

Qodobka 3:

Mabaadi’da Maaliyadda Guud

Maareynta Maaliyadda guud ee Maamulka SSC-Khaatumo, oo ay ku jirto diyaarinta iyo fullinta Miisaaniyadda Maamulka, waxaa hagaya Mabaadi’da soo socota:

1. **Isa-xisaabtan:** Dhammaan xubnaha Laanta Fullinta, waxaa kula xisaabtamaya Golaha Dhexe ee Maamulka SSC-Khaatmo, sida ay u guteen mas’uuliyaddooda, la xiriirta maareynta Maaliyadda guud; sidoo kale, Xoghayaha Maaliyadda Maamulka SSC-Khaatumo, wuxuu kula xisaabtamayaa, dhammaan Saraakiisha Idman iyo habsami u fullinta xilalkooda.
2. **Dhameystirnaanta:** Dhammaan dakhliyada iyo kharajyada Golaha Fullinta Maamulka SSC-Khaatumo iyo Hay’adaha Maamulka, waa in la raaciyaa, qoondoynta Miisaaniyadda iyo dakhliga Maamulka, wadar ahaanna loo diiwaangeliyo.
3. **Faahfaahsanaanta:** Dhamaan kharajyada Hay’adaha Maamulka SSC-

Khaatumo, waa in loo sameeyaa oo kaliya ujeedada gaarka u ah qoondeynta.

4. **Joogtayn:** Miisaaniyadda Maamulka waa iney gaarto, kuna joogteeyso dheelli-tir habboon, oo taxadar leh oo u dhexeeya dakhliga iyo kharajka.
5. **Qaab-dhismeedka Siyaasadda Maaliyadda:** Miisaaniyadda Maamulka waa in loo diyaariyaa, si ku saleysan muddada dhexe. Qaab-dhismeedka Siyaasadda Maaliyadeed, waxaa ka mid noqonaya, saadaasha dhakhliga iyo kharajka Maamulka SSC-Khaatumo iyo Hay'adaha Maamulka ee muddada dhexe iyo farqiga u dhexeeya istratijiyada maalgelinta dakhliga iyo kharajka;
6. **Daah-Furnaan:** Kaalinta kuwa lagu aaminay hawlaha maareynta maaliyadda waxaa si cad u qeexaya Xeerkanama xeer-nidaamyayaasha loo sameeyo; si xogta maaliyadeed ee Miisaaniyadda Maamulka loo helo waqtiga loo baahanyahay.
7. **Maamulka Khasnadda Mideysan:** Dhammaan ilaha lacageed ee Hay'adaha Maamulka, waa in lagu shubaa Khasnadda Mideysan, lana ilaaliyo iyadoo la raacayo maareyn hufan oo wax ku ool ah ee Lacagaha caddaanka ah iyo Habraacyada Bangiga oo loo dejiyo Khasnadda Mideysan ee Maamulka.

Qodobka 4:

Qeexid

Haddii aan si kale loogu qeexin Xeerkan dhexdiisa, ereyadan soo socda waxaa looga jeedaa:

1. **"Xoghaye"** Waxa loola Jeedaa Xoghayaha Xafiiska Maaliyadda Maamulka SSC-Khaatumo Soomaaliya.
2. **"Xafiiska"** Waxa loola Jeedaa Wasaradda Maaliyadda ee Maamulka SSC-Khaatumo Soomaaliya;
3. **"Soo Jeedinta Miisaaniyadda"** waxaa loola jeedaa qabyo-qoraalka Miisaaniyadda Maamulka ee uu Xoghayaha u gudbiyey Golaha Dhexe ee Maamulka SSC-Khaatumo.
4. **"Kutalagal Qoondo"** Waxa loola jeeda shayga leh kharaj ee ku jira Xeerka Kutala galka-Qoondada ama Xeerka kabista kutala galka-Qoondaha Dheeriga ah;
5. **"Hanti-Dhawraha"** Waxa loola jeedaa sarkaalka u xilsaaran ama leh awoodda Xafiiska Hanti-Dhawrka ee sameeya baadhitaanada iyo dabagalka xisaabaadka iyo maaraynta maaliyadda guud ee Maamulka.
6. **"Sarkaalka Idman"** Waxa loola Jeedaa Sarkaalka guud ee ku xusan Qodobka 12 ee xeerkan.
7. **"Amaahsi"** waxa ku jira deymaha, damaanadaha deynta iyo wax kasta oo kale ee aaladaha deynta iyo fududeeyaha amaahda ka mid ah.
8. **"Bangiga"** Waxa loola Jeedaa Bangiga Maamulka SSC-Khaatumo.
9. **"Jadwalka Xisaabaadka"** waxaa loola jeedaa qaabdhiska tirro xisaabeed

qaabeysan oo loo adeegsado in lagu kala saaro laguna diiwaangeliyo dhaqdhaqaaqa misaaniyadda dakhliga iyo kharajka.

10. **"Ballanqaadka"** waxaa loola jeedaa waajib sharciyeed oo leh fullin qasab ah ee lacag bixin dhinac kale.
11. **"Sannad Maaliyadeed"** Waxaa loola jeedaa muddada 12-ka bilood oo isku xigta oo qiyaasta Miisaaniyadda iyo hawlgalladeeda la diiwaangeliyay, lagu talagalay lagana warbixiyay, wuxuuna ka bilaabanayaa Sanad Maaliyeedka maalinta koowaad ee bisha Janaayo, wuxuuna ku eg yahay 31-ka bisha Diseembar ee sanadka.
12. **"Hantida Maamulka SSC-Khaatumo"** waxa loola jeedaa Hantida guurtada iyo maguurtada iyo Hantida u gaarka ah Hay'adaha Maamulka.
13. **"Dakhliga Maamulka SSC-Khaatumo"** waxa ku jira dhammaan lacagaha ay qabtaan Hay'adaha Maamulku.
14. **"Hay'ad Guud"** Waxa loola jeeda xubin kasta ee ka mid ah Maamulka SSC-Khaatumo Soomaaliya kaaso gabi ahaan ama qayb ahaan kaga jirta meel Miisaaniyadda Maamulka.
15. **"Lacag Dowladeed"** waxa loola jeedaa dhammaan lacagaha Khasnadda ama ay maamulaan hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo ama Shakhsiyaad ka wakiil ah.
16. **"Khasnadda-Mideysan"** waxaa loola jeedaa nidaam isku dhafan ee xisaabo banki oo awooda in lacagta caddaanka ah ee Maamulka loo maareeyo qaab mideysan.
17. **"Xisaabiyaha Guud"** Waxa loola jeedaa sarkaalka u xilsaaran ama leh Awoodda Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

Qodobka 5:

Khasnadda Mideysan ee Dakhliga

1. Si loogu maareeyo si hufnaan iyo wax ku ool ah, dhaqdhaqaaqa xisaabaadka, maamulka maaliyadda guud iyo hawlaha Maamulka waxaa la dhisayaa Khasnadda Mideysan ee Maamulka.
2. Waa in dhammaan Dakhliyada Maamulka lagu uruuriyo laguna baxiyo Khasnadda Mideysan ee Maamulka laguna daro Xeerka Qoondaha Miisaaniyadda Maamulka.
3. Dakhliga Maamulka waxa ku jira dhammaan lacagaha ay qabtaan Hay'adaha Maamulku oo ay ku jiraan:
 - a) Canshuurta kasta, oo ay ku jiraan Canshuurta dakhliga iyo macaashka, badeecadaha iyo adeegyada, ganacsiga caalamiga ah iyo wareejimaha kale.
 - b) Wixii khidmo ah, oo ay ku jiraan lacagta khidmadda garoonka diyaaradaha, ganaaxa, iyo lacago kale ee ganaaxa ah iyo bedelaadaha looga baahan yahay.
 - c) Ganaaxyada kala duwan.
 - d) Iibka Adeegga iyo Alaabta;
 - e) Saamiga, Kiradda, Ganaaxa iyo dakhliga kale ee Hantida.

- f) Bixinta daymaha iyo horumariska ee Miisaaniyadda Maamulka.
- g) Dhamman Deeqaha Dibedda iyo Gudaha.
- h) Dakhliga kasoo xarooda Iibka Hantida Maamulka.
- i) Ilaha kale ee dhaqaale ee aan ku qeexneyn Miisaaniyadda Maamulka.

Qodobka 6: Canshuur Dhaaf

1. Xoghayaha Xafiiska Maaliyada kaliya ayaa iska leh awoodda Canshuur dhaaf ee loo sameynayo Canshuur dhaaf walbo ee sharciga ogol yahay ee qiimaha loo dhaafi karo sida u qabo sharciga.
2. Xoghayaha Xafiiska Maaliyada ayaa looga baahan yahay in uu ku diiwaangashado Diiwaanka Maamulka iyo sababta loo sameeyey Canshuur dhaafkaba laguna soo daabici doono Bogga Xafiiska Maaliyadda.
3. Xoghayaha Maaliyadda ayaa ogaysiinaya Golaha Fulinta iyo Hanti-dhawrka Guud cashuur dhaaf walba oo sababaysan isla asbuuca la sameeyey canshuur dhaafka.
4. Xoghayaha Maaliyadda ayaa, inta lagu guda jiro Sannad Xisaabeed walba ama rubac, 30-ka Maarso, 30-ka Juun, 30-ka Sabteembar iyo 31-da Diseembar u gudbinaya dhammaan canshuur dhaafyada oo sababaysan Golaha Dhexe.
5. Xogta ku cad farqada 4-aad waxaa ku jiraya;
 - a. Ruuxa cashuur dhaafka loo sameeyey.
 - b. Sababaha cashuur dhaafka loo sameeyey.
 - c. Wadarta cashuur dhaafka ay Maamulka SSC-Khaatumo sameysay; iyo
 - d. Faaiidada Maamulku ka helay cashuur dhaafka.

QAYBTA 2:

AWOODDAHA IYO MAS'UULIYADDAHA HAY'ADDA MAAMULKA

Qodobka 7:

Awoodaha iyo Mas'uuliyadda Golaha Dhexe Maamulka SSC-Khaatumo

1. Golaha Dhexe ee Maamulka SSC-Khaatumo ayaa muus'uulka ah ansixinta Xeerka Miisaaniyadda Maamulka, iyo ansixinta Miisaaniyadda dheeriga ah inta lagu guda jiro sannad Maaliyadeedka iyo xeerarka kale ee kamid ah fullinta Miisaaniyadda Maamulka ay ku jiraan Deymaha iyo Deeqaha Maamulka.

2. Golaha Dhexe ee SSC-Khaatumo ayaa leh awoodda inuu dib u eego soo jeedinta Miisaaniyadda ayagoon wax ka badalayn dheelitirka Dakhliga iyo Kharshka, Soo jeedin walba ee dib ugu noqosho Miisaaniyadda uu sameeyo Golaha dhexe taas oo hoos u dhig ku samaynasa dakhliga ama kor uqaadaysa kharash waa inay ku cadahay soo jeedinta dakhliga loo baahan yahay ama kaydka lagu dabooli karo kharash aan ku jirin qoondada miisaaniyada la soo jeediyay.
3. Golaha Dhexe ee Maamulka SSC-Khaatumo wuxuu ka dalbi karaa xubnaha Golaha Fulinta iyo shaqaaalahooda farsamo in ay hor yimaadaan si ay u sharaxaan, sa, mashaariicda, iyo isticmaalka Miisaaniyaddooda.
4. Golaha Dhexe wuxuu tixgalin karaa khibradda iyo aragitida kuwa hor yimid, ama Guddiyada kala duwan ee Golaha Dhexe kuwaas oo hor keena cadeymo ama talo.

Qodobka 8:

Awoodaha iyo Waajibaadka Xoghayaha Maaliyada Maamulka SSC-Khaatumo

1. Xoghayaha Maaliyadda ayaa masuul ka ah dhammaan siyaasadaha iyo xaaladaha farsamo ee la xiriira habsami u socodka Nidaamka Maamulka Maaliyadda Maamulka iyo taabagalinta dhamaan agabyadda iyo dukumiintiyada uu dalbay Xeerkaniyo watiga uu cayimay, oo leh tilmaamaha siyaasadda guud ee ka timid Golaha Fulinta.
2. Xoghayaha Maaliyada ayaa ka masuul ah maaraynta lacagaha Maamulka, Khasnadda Mideysan iyo inuu kaydiyo diiwaan gelinta saxda ah xisaabaadka dhamaan cadaymaha dakhliga ee la qabtay ee soo xarooday, lacag bixinta, iyo dheeliga Khasnadda Mideysan ee Maamulka.
3. Mas'uuliyaddaha Xoghayaha Maaliyadda waxaa ka mid ah diyaarinta iyo fulinta qorshaha maaliyada mudada dhexe, Miisaaniyadda Maamulka, diyaarinta iyo faafinta xisaab xidhka sanadlaha ah oo la soo gudbinayo ugu dambayn 31-ka Maarso ee Sanadka xiga iyo xisaabaha sanadka gudihiisa, warbixinada kale ee la xiriira Miisaaniyadda, Maamulka iyo maamarynta Hantida Maamulka SSC-Khaatumo, Deymaha, Damaanadaha Maamulka SSC-Khaatumo iyo qaamaha kale ee lama filaan ka ah sida ku cad Xeerka.
4. Si waafqsan waajibaadka uu u igmaday Hoggaamiyuhu, Xoghayaha Maaliyadda waa inuu horumariyaa, fulliyaana haykalka siyaasadda maaliyadeed ee guud ee Maamulka SSC-Khaatumo, u jeedadiisuna ay tahay: -
 - a. Inuu kala taliyo Maamulka dhamaan Dakhliga Maamulka sida loo qoondeynayo iyo heerka ku talagalka Dakhligaas iyo heerka qoondo ee ugu haboon ee barnaamijyada ay leeyihiin qaybaha kala duwan ee waax kasta gudaheeda.
 - b. Inuu maareeyo, isku dubarido wada shaqaynta iyo xiriirka maaliyadeed iyo dhaqaale ee caalamiga ah, Maamulka SSC-Khaatumo Federaalka ah iyo Maamulka SSC-Khaatumo.
5. Xoghayaha Maaliyadda ayaa xaqiijinaya joogtaynta, toosnaanta maaraynta maaliyadda iyo in si cadaalada oo loo siman yahay loogu tartamo lana eego wax ku oolnimada kharashka iibka iyada oo la raaciyo xeerka iibka ee Maamulka SSC-Khaatumo.

6. Si waafaqsan Xeerarka Maamulka SSC-Khaatumo Soomaaliya, Xoghayaha Maaliyadda ayaa yagleelaya kadib marka uu ogolaansho ka helo Golaha Fulinta, qaab dhismeedka qaybaha iyo waaxyaha xafiisku ka kooban tahay, isagoo fa shuruudaha uu xeerkani jidaynayo iyadoo uu si buuxda u fuliyo howlaha halkan ku xusan, faahfaahinta la xiriirta qaabdhismeedka iyo waaxyaha waxaa lagu soo saarayaa xeer nidaamiye ama xeer uu soo saaro Xoghayaha Maaliyaddu.
7. Awoodaha iyo Mas'uuliyadaha Xeerkan uu siinayo Xoghayaha wuxuu u xilsaaran karaa ku xigeenadiisa ama mas'uuliyiinta kale ee Xafiiska. Mas'uuliyad kasta oo uu Xoghayaha u xilsaaray qof kale wuu bedeli karaa kamana qaadayso mas'uuliyadda ugu danbaysa ee uu xeerkani farayo.

Qodobka 9:

Awooddaha Xoghayaha Maaliyadda ee Soo Saaridda Xeer Hoosaadyo, Tilmaamayaal iyo Hagayaal.

1. Si xoghayaha maaliyaddu u guto waajibaadkiisa ku xusan awoodaha qodobka 8aad ee xeerkan waxa uu yeelanayaa awoodahan soo socda ee uu kusoo saarayo xeerhoosaadyo, hagayaal iyo tilmaamaha hoos ku xusan;
 - a. kadib marka Golaha Fulinta ansixiyaan xeerkan in uu aasaaso faracyo xafiiskiisa ah oo qaabilsan fulinta xeerkan.
 - b. in uu ogaysiiyo saraakiisha Idman qoraal ahaan masuuliyadooda ah isla xisaabtan cad iyo hufnaanta maamulka maaliyadda Maamulka SSC-Khaatumo iyo hantida kale ee lagu aaminay
 - c. in uu dejiyo, ka dib markuu la tashi la sameeyo masuuliyiinta ay khusayso ee xubnaha Maamulka hababka loo xiriirinayo maaliyadaha Dowladdaha hoose.
 - d. In uu soo saaro tilmaamo khuseeya xiriirada ku haboon ee maamulku la yeelanayo bangiyada iyo ha'adaha kale ee lacagaha.
 - e. In uu qaybiyo masuuliyadaha maaraynta maaliyadda hay'adaha kala duwan ee Maamulka SSC-Khaatumo.
 - f. In uu u haysto awood buuxda oo fulineed xafiisyada, saraakiisha, documintiiyada, diiwaanka maamulka maaliyadda iyo xeer hoosaadyada ee hay'adaha maamulka
 - g. In uu diyaariyo una gudbiyo Golaha Fulinta xeer hoosaadyada si ay u ansixiyaan.
 - h. In uu soo saaro xeerhoosadyo, tilmaamayaal iyo hagayaal loo isticmaalo xisaabinta, warbixinada iyo ilaalinta hantida Maamulka
 - i. In uu hubiyo in hay'ad walba ay leedahay nidaam lagu maareeyo khataraha kantaroolayaasha gudaha iyo baarayaasha gudaha.
 - j. In uu sameeyo qaybo qaabilsan habka ilaalada hantidhowrka gudaha ee ku haboon hay'adaha Maamulka kuwaasoo shaqadoodu waafaqsan tahay nidaamka iyo shuruucda nidaamka caalamiga ah ee hantidhowrayaasha gudaha.
 - k. In uu sameeyo habraacyo ku haboon baarista gudaha ee hay'adaha Maamulka.

- l. In uu ka dhex sameeyo Xafiiska nidaam isku xiran oo ku haboon xakamaynta kharashyada iyo dhacdooyinka kale ee dhaqaale ee lagu galay miisaaniyada Maamulka, sidoo kale maamulka lacagaha.
- m. In uu dejiyo habraac ku haboon in lagu maamulo, kormeero laguna warbixiyo hantida Maamulka.
- n. In uu sameeyo nidaamka ku haboon maamulka maaliyadda, oo ay ku jiraan kala saarsaarka madaxyada hay'ada Maamulka SSC-Khaatumo iyo waaxyahooda kala duwan iyo habkasta oo ah nidaamka kombuyuutarka ee hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo kuwaasoo saamaynaya maamulka Maaliyadda.

Qodobka 10^{aad} Xisaabiyaha Guud

1. Xisaabiyaha guud waxaa magacaabaya Hogaamiyaha Maamulka SSC-Khaatumo, waxa uuna u madax banaan yahay shaqada xafiiska, isaga oo raacaya xeerarka iyo habraacyada Maaliyada . Masuuliyadaha Xisaabiyaha Guud waxaa ka mid ah;
2. Waajibaadka Xisaabiyaha Guud waxaa kamid ah;
 - a) In uu maamulo Xisaabaadka Miisaaniyadda Maamulka, ilaaliyana xisaabaadka hay'ad walba.
 - b) In uu fasaxo lacagaha ka baxa khasnada midaysan ee Maamulka SSC-Khaatumo marka uu golaha dhexe ansixiyo miisaaniyada.
 - c) In uu kormeero, baaro, geli karana dhammaan xafiisyada iyo Hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo ee lacagta iyo hantida maamulka SSC-Khaatumo gacanta ku haya, ee maamula ama xafida.
 - d) In uu soo saaro amaro joogtaynaya nidaamka ilaalinta ballan-qaadyada (Commitment Control system), ilaalinta korjoogtaynta, diwaangelinta, iyo warbixinta ballanqaadyada hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo
 - e) In uu guddoomiyo Guddiga Maamulka Khasnadda Mideysan, warbixinna ka siiyo Xoghayaha
 - f) In uu soo saaro saadaasha lacagaha naqdiga ee Khasnadda Mideysan ee Maamulka SSC-Khaatumo
 - g) In uu diyaariyo Xisaabaadka Khasnadda Mideysan ee Maamulka SSC-Khaatumo, soona jamciyo xisaabaadkooda oo dhan. Mas'uul ka ahaado soo saarista, wax ka bedelka shaxda xisaabaadka iyo hirgelinta nidaamka xisaabaadka ee danabaysan.
 - h) In uu kormeero xaqiijiyana sax ahaanshaha qabashada iyo bixinta lacagta Maamulka SSC-Khaatumo, maareynta lacagaha naqdiga ah iyo kaydka Maamulka SSC-Khaatumo, sida la isugu gudbiyay lacagaha Maamulka SSC-Khaatumo, dammaanadaha, shaabadaha iyo hantida kale ee maamulka SSC-Khaatumo.
3. Xisaabiyaha Guud ee Maamulka SSC-Khaatumo wuxuu kala shaqaynayaa Xisaabiyaha Guud Wasaarada Maaliyada ee Federaalka, wixii ku saabsan

xisaabaadka dalka, warbixinada ku saabsan lacago isu gudbinta Maamulka SSC-Khaatumo iyo Dawlada Federaalka Soomaaliya.

4. Gudiga Maamulka Khasnaadda Guud waa in uu Xoghayaha magacaabo, waxaana hawshooduna tahay in ay dib-u- eegis ku sameeyaan saadaasha lacagta naqdiga ah , kor joogteynta, isku-xirka maamulidda lacagta naqdiga ah iyo daymaha Khasnadda Mideysan ee Maamulka SSC-Khaatumo, Waajibaadka shaqo iyo xubnaha ay ka koobnaan doonaanba waa in xoghayaha Maaliyaddu ku soo saaraa xeer-nidaamiye.

Qodobka 11^{aad}

Hanti-dhawrka Guud Maamulka SSC-Khaatumo

1. Xafiiska Hanti-dhawrka Guud waa in uu ahaato xafiis madax-banaan sida ku cad Axdiga Maamulka SSC-khaatumo waxaana soo magacaabaya Hogaamiyaha Maamulka SSC-khaatumo kadibna waxaa ansixinaya Golaha Dhexe.
2. Xafiiska hantidhowrku waa inuu hubiyo sax ahaanshaha Maaliyadda, waxqabadka, iyo inuu dabagal ku sameeyo dhamaan hay'addaha Maamulka SSC-Khaatumo, hay'adaha madaxa banaan. Mashruucyada iyo shirkadaha Maamulka SSC-Khaatumo, iyo hay'ad walba oo la siiyo Mucaawinooyinka Maamulka SSC-Khaatumo.
3. Diiwaangalinta dhammaan sharciyada iyo heshiisyadda, diiwaangalinta Hantida guurtadda iyo maguurtadda, kala wareejinta Miisaaniyadda, deeqaha, iyo dhacdo dhaqaale kastoo kale sida ku cad Xeerkan.
4. Baaritaanada dhammaan hawlaha la xiriiira Dakhliga, Kharajyada, Hantida, Dhulalka, iyo Hantida Maguurtadda ee Maamulka.

Qodobka 12^{aad}

Saraakiisha Idman

1. Waxaa hay'ad, wakaalad iyo mashruuc kasta oo Dowlad leedahay loomagacaabayaa saraak idman, kaasoo caadiyan masuul ka ah hay'adah ama xafiiska uu maamulayo, loona igmaday. Saraakiisha idman waxaa ka mid ah;
 - a. Agaasimayaasha Xafiiskaha iyo Hay'adaha kale ee madaxa banaan.
 - b. Kaaliyaha Guud ee Garsoorka.
 - c. Xoghaynta Golaha Dhexe.
- d. Iyo sarkaal kasta oo shaqo gaar ah oo cayiman loo xilsaaray.
2. Sarkaal kasta oo idman ee hay'adaha iyo shirkadaha Maamulka SSC-Khaatumo wuxuu mas'uul ka yahay dhammaan arrimaha la xiriiira maamulka lacagaha dadweynaha, hantida iyo qaamaha hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo ee uu mas'uulka ka yahay, taasi oo ay ka mid yihiin:-
 - a. Diyaarinta qorsha sannadeedka, miisaaniyadda iyo ku-tala-galka Kharashka ee qorshaha xilliga dhexe ee hay'adda uu masuulka ka yahay.
 - b. Ilaalinta iyo kor-joogteynta fulinta Miisaaniyadda hay'adda uu masuulka ka yahay, si waafaqsan Xeerkan, xeer-nidaamiyeyaasha iyo habraacyada

xoghayaha Maaliyadda.

- c. Haynta xisaabaadka iyo diiwaanada hay'adda uu masuulka ka yahay si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha ama hageyaasha uu soo jeediyi Xisaabiyaha Guud;
- d. Diyaarinta iyo u-gudbinta warbixinada Xafiiska ama Xisaabiyaha Guud sida uu qabo Xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha ama hageyaasha raacsan Xeerkan;
- e. Diyaarinta iyo hirgalinta qorshaha Kharashka baxaya isagoo la tashanaya Xafiiska waana inuu ogolaadaa xoghayaha maaliyaddu.
- f. Maareyn hufan, wax-ku-ool ah, oo daah-furan lagu maamulo dhammaan lacagaha hay'adda;
- g. In si hufan, wax ku ool ah, oo daah-furan loo yagleelo ilaalinta gudaha (internal controls), maareynta khataraha (risk management) iyo baarisaha gudaha;
- h. Kormeeridda iyo xaqiijinta in sida ugu habboon loo isticmaalo lacagaha Maamulka SSC-Khaatumo ee hay'dda uu masuulka ka yahay hoos yimaadda;
- i. Bixinta macluumaad kasta oo ay ka dalbadaan Xafiiska iyo Xafiiska Hanti Dhowraha Guud.
- j. Fulinta soo-jeedimaha hanti-dhowrista ee ay Xafiiska iyo Hanti Dhowraha Guud soo jeediyeen.
- k. Xaqiijinta ku-dhaqanka dhammaan qodobada ku xusan Xeerkan iyo xeernidameyaasha kale ee uu soo saaro xoghayaha Maaliyaddu iyo Shuruucda kale ee la xiriira Maareynta Maaliyadda Maamulka SSC-Khaatumo.
- l. In uu diyaar u noqdo in Golaha dhexe kala xisaabtami doono dhammaan lacagaha Maamulka SSC-Khaatumo iyo hantidii lagu aaminay hay'adda uu mas'uulka ka yahay.

QAYBTA 3aad.

DIYAARINTA IYO ANSIXINTA MIISAANIYADDA

Qodobka 13 aad

Qorshaha Siyaasadda Miisaaniyadda

1. Xoghayaha Maaliyadda ayaa mas'uul ka ah diyaarinta iyo faafinta buugga Haykalka Siyaasadda Maaliyadda Xilliga Dhexe kaas oo daboolaya muddo seddex sano ah, kana bilaabaneysa sannad maaliyeedka xiga. Markii sannad dhamaado waxaa lagu sii darayaa sannad kale si mar walba loo hayo 3 sannadood.
2. Buugga Haykalka Siyaasadda Maaliyadda Xilliga Dhexe waa in ay ku jiraan ugu yaraan;
 - a. Qoraalka hadlaya yoolasha siyaasadeed ee maamulka SSC-Khaatumo ee la hirgelinayo xilliga dhexe iyo kan fog.
 - b. Saadaasha Dhaqaalaha Guud (Macroeconomic) ee saddexda sano ee soo socota;
 - c. Qiimeynta isbadaladdii ugu dambeeyey ee ku yimid horumarka dhaqaalaha guud iyo natiijada ka soo baxday Miisaaniyadda;

- d. Saadaasha Dakhliga iyo Kharshka Miisaaniyadda sadexda sano ee soo socota.
 - e. In la muujiyo farqiga iyo qorshaha maaliyadeed ee lagu dabooli lahaa Miisaaniyadda saddexda sano ee soo socota.
3. Xeer-nidaamiye ayaa lagu caddeynayaa muddada iyo habraaca loo diyaarinayo faafinta Buugga Haykalka Siyaasadda Maaliyadeed ee Xilliga Dhexe.

Qodobka 14^{aad} **Qaab-dhismeedka Miisaaniyadda**

1. Xoghayaha Maaliyaddu waa in uu hubiyaa in diyaarinta Miisaaniyaddu wafers tahay siyaasadda muddada dhexe.
2. Dhammaan Dakhliga iyo Kharashaadka ee Khasnada Mideysan waa in loo kala sooco sida ay iskugu midka yihiin labada dhinac ee Miisaaniyadda iyo Xisaabaadka. Waa in uu waafaqsan yahay hannaankan;
 - a) Kala saarida miisaaniyadda waa in uu waafaqsan yahay nidaamka Qaramada Midoobay ee noocyada shaqo ee Dowladdaha, ugu yaraan kala soocid maamul iyo dhaqaale kuwaas oo waafaqsan habraaca xisaabaadka caalamiga ah ee Hay'adda Lacagta Adduunka (IMF).
 - b) Xoghayaha Maaliyadda ayaa mas'uul ka ah diyaarinta iyo kala saarsaarka qaabka miisaaniyaddu isu raacraacayso, wuxuuna soo saarayaa tilmaamo faahfaahsan, oo ku saabsan, fulinta miisaaniyadda iyo xisaabaadka, kadib markuu hubiyo in qolo walba u diyaarsan tahay.
 - c) Haddii isbedel lagu sameeyo qaabka kala saarsaarka kadib markii Golaha dhexe loo diray, xoghayaha maaliyaddu waa inuu ogaysiin hore u diraa Golaha dhexe ugu yaraan 30 cisho kahor inta aan miisaaniyadda la horgeyn.
 - d) Xoghayaha Maaliyaddu waa inuu u diraa Golaha dhexe iyo Xafiiska Hanti Dhawrka faahfaahin buuxda oo ku saabsan kala saarsaarka cusub iyo saamayntooda xisaabaadka. Waa in warbixinno laga diyaariyaa, xogtana la kaydiyaa si ay u fududaato marka la isku aadinayo xisaabtii hore iyo tii la bedelay.
 - e) Kala saarsaarku waa in uu waafaqsan yahay nidaamkan hoose;
 - i. Dakhliga iyo hantida kale waxaa loo nidaaminayaa madaxyo faahfaahintooda lagu sheegi doono xeer nidaamiyeyaal ka farcamaya Xeerkan.
 - ii. Kala soocidda maamul ee Miisaaniyadda waa inay waafaqdo liiska Hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo iyadoo loo sii sarrifayo waaxyo iyo qaybo hoose oo aawood u leh inay kharakh baxshaan. Waxaa kaloo loo kala saarsaarayaa nooca kharash sida lagu sheegi doono xeer nidaamiyeyaasha laga hoos samayn doono Xeerkan.
 - iii. Kharashaadka aan khusayn Hay'ad Dowladeed ee uu xoghayaha Maaliyaddu mas'uulka ka yahay sida bixinta deymaha iyo kharashaadka

kale ee sharcigu khasab ka dhigayo, waa in loo maamulo sida lagu sheegay qodobka 9 (1) ee Xeerkan.

Qodobka 15aad:

Aasaaska Guud iyo Guud-marka Miisaaniyada.

1. Miisaaniyadda waa inay ka koobnaataa dhammaan dakhliga iyo kharashka Maamulka SSC-Khaatumo oo ay ku jiraan dhammaan wareejinada loo wareejiyo Dowladdaha hoose, hay'adaha madaxa bannaan, deeqaha, shirkadaha dowladdu wax ku leedahay, bangiyada, hay'adaha aan faa'iida doonka ahayn, ama shaqsiyaad.
2. Iyadoo la isticmaalayo xog sugan, miisaaniyadda waa in lagu daraa kabista miisaaniyadda toos looga helo deeq bixiyeyaasha, kabista guud, deeqaha loogu talo galay meelo gaar ah, iyo mashaariicda.
3. Miisaaniyadda waa in ay noqoto hal miisaaniyad oo mideysan oo ka kooban Miisaaniyadda joogtada ah iyo tan Raasumaalka ah.

Qodobka 16 aad

Dakhli Dheeri ah / la fileyn

Miisaaniyada Marka uu ka bato Dakhligii la filayay, dakhligaa dheeriga ah looma isticmaali karo Kharash iyadoo aan ogolaansho laga haysan Golaha Dhexe.

Qodobka 17 aad

Hannaanka Diyaarinta Miisaaniyadda Sanadlaha ah

1. Xoghayaha Maaliyaddu waa inuu diyaariyaa, shaaciyaana jadwalka diyaarinta miisaaniyadda oo ay ku jiraan qodobadan hoose, sidan ay isugu xigaan:
 - a. Diyaarinta iyo faafinta buugga Haykalka Siyaasadda Miisaaniyadda xilliga dhexe
 - b. U soo saaridda Hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo Wareegtada Soo-gudbinta Miisaaniyadda oo waafaqsan siyaasadda xilliga dhexe iyo xadka loo sameeyey, qaabka loo soo gudbinayo iyo wakhtiga la soo gudbinayo.
 - c. Waaxda Miisaaniyadda ee Xafiiska Maaliyadda waa in ay qabataa kulamo lagu wargelinayo shacabka lagalana tashanayo, siyaasadda Miisaaniyadda sannadka soo socda
 - d. Isu geynta miisaaniyadda ay soo gudbiyeen dhammaan hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo.
 - e. Wada-xaajood u dhexeeya Xafiiska Maaliyadda iyo Hay'adaha oo ku saabsan soo jeedinta miisaaniyadda iyo in ay waafaqsan tahay siyaasadda Maamulka SSC-Khaatumo iyo dhaqaalaha.

- f. U gudbinta Miisaaniyadda ee Golaha Fulinta.
 - g. U gudbinta miisaaniyada ee Golaha Dhexe.
 - h. Ansixinta kadib, waxaa dhammaan hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo loo dirayaa Miisaaniyaddii oo ansaxsan si ay u dhaqan geliyaan.
2. Dhammaan qodobadan kore waa in la maraa si loo ansixiyo Miisaaniyadda sannadka danbe inta uusan dhammaan sannadka lagu jiro.
 3. Waaxda Miisaaniyadda ee Xafiiska Maaliyada waxay la wadaagaysaa nuqul miisaaniyadda ah waaxda miisaaniyadda ee Maamulka SSC-iyada Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 18^{aad}

Dokumentiyada iyo Tusmoyinka Soojeedinta Miisaaniyadda

1. Soojeedinta Qoondada Miisaaniyadda uu u gudbiyey Xoghayaha Maaliyaddu, Golaha dhexe waa in ay ku jiraan;
 - a. Buugga Haykalka Siyaasadda Maaliyadda
 - b. Qabyo qoraalka xeerka qoondada iyo faah-faahinta dakhliga la filayo iyo qoondooyinka; iyo warbixin ay ku jiraan; natiijadda isbadalka Miisaaniyadda sannadkii tagay iyo sannadka soo socda.
 - c. Xeer maaliyadeedkaas oo qeexaya qiimaha tacrifada cashuur ahaan loo qaadayo iyo dakhliga kale ee aan Cashuurta ahayn ee sannad maaliyadeedka soo socda, kaas oo waafaqsan dakhliga miisaaniyadda ee la filayo oo ay ku jiraan qiyaasta Cashuur kasta oo kale oo cusub ama isbedelka qiimaha tacrifada Cashuurta ee jira; taasoo loo gudbinayo Golaha dhexe kama danbays maalinta la gudbinayo miisaaniyadda.
 - d. Lifaag sheegaya inta ay la egtahay daymaha lagu leeyahay Maamulka SSC-Khaatumo iyo damaanadaha dowladdu samaysay.
 - e. Lifaag soo koobaya kharashka hawlgaal ee hay'adaha madaxa bannaan, tilmaamayana qoondada miisaaniyadda Maamulka SSC-Khaatumo laga siinayo.
 - f. Lifaag soo koobaya qorshaha maaliyadeed iyo hawgal ee sannadkaas ee hay'adaha dowladdu leedahay ama bankiga. Qaabka lifaaqaas waxaa lagu sheegi doonaa xeer nidaamiyeyaasha ka farcamaya Xeerkan.
 - g. Lifaag si kooban u tilmaamaya dhammaan lacagaha laga helo deeq bixiyeyaasha, isagoo kala saaraya lacagaha loogu talo galay Maamulka SSC-Khaatumo iyo meelaha kale. Qaabka loo dhigayo lifaaqaas waxaa lagu sheegayaa xeer nidaamiyeyaasha uu Xoghayaha Maaliyaddu kasoo saari doono Xeerkan hoostiisa.
 - h. Lifaag si kooban loogu muujinayo shaxaha cashuuraha ee sanadka soo socda.
2. Waxaa kaloo la tixgelinayaa iyadoon laga tagayn qodob 19 (1.j) shuruuc, siyaasado iyo cabir kale oo sababi kari isbedel siyaasadaha dakhliga cashuuraha iyo dakhliga aan cashuuraha ahayn iyadoo la horgayn doono Golaha Dhexe.

Qodobka 19^{aad}

Qoondaynta Lama Filaanka Miisaaniyadda,

1. Golaha dhexe ayaa ansixin doona qoondada ku-tala gal aan la fileyn oo aan ka badneyn 5% wadarta guud ee Dakhliga gudaha, sida lagu saadaaliyey Miisaaniyadda oo loogu talo galayo in uu daboolo Kharash ay baahi deg deg ahi keentay ama kharash aan hore loo sii saadaalin oo aan ku-talogal kale ugu jirin Miisaaniyadda.
2. Qoondada ku talogalka aan la filayn waxaa lagu bixin karaa kharash si degdeg ah loogu baahan yahay in la bixiyo isla sannad maaliyadeedkaas, kharashkaas oo aan hore loogu saadaalin miisaaniyadda sannadlaha ah, Isla markaana aan Kharash bixintaa dheeriga ah dib loo dhigi karin inta laga gaadhayo miisaaniyadda ku celiska ah ee kabka Miisaaniyadda ama aan kharash bixintaas Miisaaniyadda sannadka dambe lala sugi karin, oo aan u keenayn dhaawac danta guud ee Maamulka SSC-Khaatumo. Isticmaalka qoondada lama filaanka loogu talo galay waa in Xoghayaha Maaliyaddu la socodsiiyaa guddiga dhaqaalaha ee Golaha Dhexe 3 biloodka ku xiga iyadoo la sheegayo bisha uu kharashkaas baxay

Qodobka 20^{aad}:

la socodka Miisaaniyada ee Dadweynaha

Marka miisaaniyadda la ansixiyo waa in si degdeg ah loogu fududeeyo dadweynaha inay helikaraan lana socon karaan.

Qodobka 21^{aad}

ansixinta Miisaaniyadda Maamulka

1. Golaha Dhexe wuxuu ansixinayaa Xeerka Qoondada Miisaaniyadda si waafaqsan sharciga.
2. Miisaaniyadda marka la ansixiyo waxay noqonaysaa sharci, waana hal sannad maaliyadeed oo ku-eg dhammaadka sannad maaliyadeedka la ansixiyey sannadka ku xiga.
3. Xeerkan Sannadlaha ah ee ku talo-galka qoondada Miisaaniyadda waa in la meel mariyo ka hor bilowga sannad Maaliyadeedka loogu talo galay

Qodobka 22^{aad}:

Wax ka bedelka qoondada Miisaaniyadda ee Golaha Dhexe

1. Marka uu Golaha Dhexe ansixinayo qoondada Miisaaniyadda ee uu hor keenay Xoghayaha maaliyadda, Goluhu waxay soo jeedin karaan wax ka bedel iyagoo bixinaya sharraxaad wax ka bedel kasta oo ay soo jeediyaan, tilmaamayana madaxyada Miisaaniyada ay ka muuqanayso, soona jeedinaya in isbedelkan uu waafaqsan yahay siyaasadda dhaqaale ee Maamulka iyagoo hubinaya in qoondadu ay ka tarjumayso sida ugu wanaagsan ee waxqabadka.

Qodobka 23^{aad}:

Isticmaalka miisaaniyadda ku-meelgaarka ah

1. Haddii Golaha Dhexe meel marin waayo miisaaniyadda ka hor bilowga sannad maaliyadeedka, waa in uu xeerku ogalaado in si ku meelgaadh ah loo isticmaalo miisaaniyaddii sannadkii hore muddo markii la isku darro aan ka badneyn saddex bilood. Xoghayaha Maaliyadda waxaa xeerarku u ogolaanayaa inuu ururin karo dakhli, bixina karo kharash si waafaqsan qoondada miisaaniyadda in aan ka badnayn 1/12 miisaaniyaddii sannadkii hore.
2. Isticmaalka miisaaniyadda ku meelgaarka ah waxay ku salaysan tahay qoondada la horgeeyey Golaha Dhexe.
3. Inta lagu guda jiro muddada isticmaalka ku meelgaadhka ah ee miisaaniyadda, awoodsiinta Kharashbixintu waa in ay ku xaddidan yihiin 1/12 wadarta guud ee Kharashka ka muuqata madax-xigeen kasta ee Qoondada Miisaaniyadda bil kasta oo ka mid ah muddada ogalaanshaha
4. Marka Kharashku leeyahay mudo xaddidan oo lagu bixinayo ay ku soo aado waqtigan Isticmaalka ku meelgaadhka ee Miisaaniyadda waa suuro gal in la bixiyo dhammaan wadarta ay waajibtey kharashbixinteedu, balse haddii wakhtiga bixinteeda ka baxsan yahay muddada ku xusan qodobkan (1) lacagtaas waa in aan la isticmaalin ama la bixin.

Qodobka 25^{aad}:

Kabidda iyo ku Noqoshada Miisaaniyadda ee Saannadka Dhexdiisa

1. Inta lagu guda jiro sannad miisaaniyadeedka la ansixiyey, waxa wax laga bedeli karaa Miisaaniyadda iyada oo la isticmaalaayo qaab kab Miisaaniyadeed oo uu soo diyaariyey Xoghayaha Maaliyaddu, Golaha Dhexe-na ansixiyey.
2. Diyaarinta, ansixinta iyo fulinta kabka miisaaniyadda wuxuu marayaa inta uu maro miisaaniyadda guud ee Maamulka SSC-Khaatumo sida Xeerkan dhigayo
3. Xoghayaha Maaliyaddu waa in uu u gudbiyaa Golaha Dhexe warbixinta bartamaha- sannad maaliyadeedka ee fulinta Miisaaniyadda, isaga oo aan ka dib dhicin 20 bisha september ee sannad kasta, kuna soo lifaaqayo taxliilka dakhliga soo xarooday, Kharashyada baxay lixda bilood ee hore sannad maaliyadeedka iyo hadii loo baahdo talo soo jeedin kab miisaaniyadeed oo u baahan ogalaanshaha Golaha Dhexe.
4. Si loo hubiyo in Golaha Dhexe aan loo gudbin laba miisaaniyadood oo kala duwan xilliga miisaaniyadda la ansixinayo, waa in Xoghayaha Maaliyaddu hubiyaa in miisaaniyadda kabka loo gudbiyaa Golaha Dhexe ugu danbayn 20 september isla sannad maaliyadeedka uu kabku khuseeyo. Golaha Dhexe waa inuu ansixiyaa kabka miisaaniyadda inta ka horraysa 10 October sannad walba.

Qodobka 26^{aad}:

Saamaynta Dhaqaale ee Dhaqangelinta Hindisaha xeerarka

1. Dhammaan hindsaha xeerarka ee laga rabo oggalaanshaha Golaha Dhexe waa in la soo raaciyo cadeymo sugaya saamayntooda miisaaniyadeed, oo sheegaya

shuruucdaas sida ay raad ugu yeelan karaan dakhliga iyo Kharashyada sannad maaliyadeed kan iyo saamaynta qorshe iyo miisaaniyad ee sanadaha ku xigaba.

2. Xoghayaha Maaliyaddu waa in uu soo diyaariyo tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan nooca faahfaahin oo loo baahan yahay iyo habraaca lagu xaqiijinaayo saamaynta dhaqaale ee hindisaha xeerarka.

Sidoo kale Xoghayaha Maaliyaddu waa in uu usoo raaciyaa fikraddiisa ku aaddan Golaha Dhexe suurto galnimada faahfaahinta saamaynta dhaqaale ee la soo diyaariyey

Qodobka 27^{aad} Kharaj dheeri ah

Hadii ay Hay'adaha Maamulku ay bixiyaan Kharajyo xad-dhaaf ah ama ay sameeyaan kharaashaad aan qorshaha ku jirin ansixinta kabka Miisaaniyadda hore ee Golaha Dhexe bixiyay, Kharajka xad-dhaafka ama aan ku jirin Miisaaniyadda waa sharci darro waxaana laga goynayaa qoondada hay'adda Maamulka SSC-Khaatumo Miisaaniyadda Maamulka durba sanadka maaliyadeedka xiga ka dib isla marka ay oggolaadaan Golaha Dhexe.

Qodobka 28^{aad} Ogeysiis saameynta Miisaaniyadda ee qabyo qoraalka sharciga

1. Dhammaan Sharciyadda lasoo jeediyay in ay ansaxiyaan Golaha Dhexe waa in lagu lifaaqo ogeysiis ah saameynta miisaaniyadooda, ka
2. bilaabata saadaasha saameynta dakhliga iyo kharajyada sanadka hore iyo sanadka xiga.
3. Xafiiska Maaliyadda Maamulku SSC-Khaatumo ayaa soo saareysa sidoo kale gaarsiineysa ogeysiis ah saameynta Miisaaniyadda ka hor u soo jeedinta qabyo qoraalka Golaha Fulinta.
4. Xoghayaha Maaliyaddu wuxuu siinayaa talo golaha fulinta awoodida qabyo qoraal kasta ogeysiis ahaan saameynta uu ku lee yahay Miisaaniyadda.
5. Xoghayaha maaliyadda ayaa diyaarinaya hage faah-faahsan oo ah diyaarinta ogeysiiska saameynta Miisaaniyadda.

QAYBTA 4^{aad}

DHAQAN GELINTA MIISAANIYADDA

Qodobka 29^{aad}:

Masuuliyadda Dhaqangelinta Miisaaniyadda

1. Xoghayaha Maaliyadda ayaa masuul ka ah maamulka guud ee fulinta miisaaniyadda Maamulka SSC-Khaatumo iyo midda kabka ah.
2. Xoghayaha Maaliyaddu waa u wakiilan karaa mas'uuliyadihiisa qayb ahaan ama dhammaantood shaqooyinka la xiriiira dhaqan galinta Miisaaniyadda Xisaabiyaha Guud. Kaasoo masuul uga noqonaya habraacyada oo dhan, maamulka iyo sii daynta kharashaadka miisaaniyadda, lacagta iyo maamulidda heshiisyada kharash ee hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo ee qoondada leh. Awoodda loo wakiishay Xisaabiyaha Guud waa in ay waafaqsan tahay shuruucda kale ee qeexaysa awoodaha ku xigeennada iyo kuwa kale ee awoodaha sharci leh oo ka mid ah saraakiisha Maamulka SSC-Khaatumo. Wakiilashadaan mas'uuliyadeed waa in lagu sheegaa xeer nidaamiye laga hoos sameeyo Xeerkan, aysanna noqon mid ka qaadaysa xilka iyo awoodaha Xoghayaha Maaliyadda iyo mas'uuliyadaha guud ee uu Xeerkan ku waajibiyay.
3. Saraakiisha Idman, ee ku xusan qodobka 12 ee Xeerkan, ayaa mas'uul ka ah u fulinta si sax ah uguna habboon miisaaniyadda hay'adda loo xilsaaray sida uu qabo Xeerkan, xeer nidaamiyeyaasha ka farcamay, iyo tilmaamaha iyo amarada uu Xoghayaha Maaliyaddu soo saaray. Sidoo kale, waxay si buuxda u hoos tegayaan Xoghayaha Maaliyadda iyo Golaha Dhexe inta ay ku jiraan fulinta miisaaniyadooda.
4. Saraakiisha Idman waxay si qoraal ah ugu xilsaari karaan awoodaha fulinta dhaqan galinta Miisaaniyadda saraakiil kale oo kala shaqeeya hay'adaha ay maamulaan. Wakaalashada noocaas ah waa in aysan ka wareejin sarkaalka, Xoghayaha Maaliyadda iyo madaxda kale mas'uuliyadda uu Xeerkani iyo habraacyadiisuba ku waajibiyeen.

Qodobka 30^{aad}:

Heerarka Fulinta Miisaaniyadda

1. Si loo kabo xeer nidaamiyeyaasha laga soo hoos saaray Xeerkan, waa in Xoghayaha Maaliyadda soo saaraa tilmaamo iyo hagaayaal qeexaya heerarka kala duwan ee fulinta miisaaniyadda oo ay ku jiraan oo aan ku ekeyn qoondo meel loo dhigay iyo ballamada kharash bixin. Habraacyada iibka oo ay ku jiraan wax soo iibsiga iyo bixintooda waana inay waafaqsanaadaan Xeerka Iibka Maamulka SSC-Khaatumo.

Qodobka 31^{aad}:

Xeerarka Guud ee la Xiriira Fulinta Miisaaniyadda

1. Habraacyada fulinta miisaaniyadda waxaa lagu qeexayaa xeer nidaamiyeyaasha ka farcamaya Xeerkan, waxaana lagu sii faahfaahinayaa tilmaamo iyo qoraallo uu Xoghayaha Maaliyadda soo saari doono mustaqbalka.
2. Koontaroolka guud ee fulinta miisaaniyadda waxaa hagaya habraacyadan hoose oo loo isticmaalayo dhacdo walba sida kharash bixin iyo dakhli xerayn.
 - a. Waa in aysan dhicin ballan qaad iyo Kharash bixin ay sameeyaan Hay'adaha Dowladdu oo ka badan ama ka baxsan qoondada Miisaaniyadda ,waxa ayna ku xidhan tahay lacagha loo hayo ee ku cad qoondayinka kala duwan ee Miisaaniyadda si waafaqsan farqada (b)
 - b. Wadarta guud ee astaynta qoondooyinka kala duwan ee hay'ad dowladeed ee sannad maaliyadeed, waa inaysan ka badan qoondada sannadka loogu ogolaaday Xeerka miisaaniyadda ee sannadkaas. Waxaa dhici karta in isbedello lagu sameeyo isla sannadkaas iyadoo loo marayo qodobada ku xusan qodobka 19aad ee Xeerkan iyo Xeerka kabka ee soo baxa sannadka dhexdiisa.
3. Inta aan ka ahayn kharash muddo kooban ay dowladdu u baahato inay ku bixiso adeeg, iyadoo la waafajinayo shuruucda, khasnadda guud lagama bixin karo kharashka adeegyada maamulka aan ka ahayn inta lagu xusay qiyaasta miisaaniyadda sannadlaha ah taasoo wax laga bedelo mararka qaar xilliga ku noqoshada miisaaniyadda.

Qodobka 32^{aad}

Qorshaha Kharaj Bixinta

1. Sarkaalka Mas'uulka ka ah Hay'ada Maamulka ayaa u soo gudbinaya Xogahaya Maaliyadda, ka hor ansixinta Miisaaniyadda losoo jeedshay Golaha Dhexe, qorshaha qarash ay ku jiraan qiyaas bileed Kharaj ee qoondaha Miisaaniyadda Maamulka, sida iyo xilliga uu u soo qoro Xogahaya Maaliyadda.
2. Sarkaalka Mas'uulka ka ah Hay'ada Maamulka ayaa ku noqonayo qorshaha qarashaynta iskuna soo dubaridayaa Kharaj bileedka kuna saleeyo Miisaaniyadda sannadka una soo sameeyo sida tubta uu Xogahaya Maaliyaddu u jeexay.

Qodobka 33^{aad}

Heshiisyada iyo qandaraasyada soo iibsiga

1. Dhammaan iibka alaabada iyo adeegga oo ay ku jiraan maalgelinta hantida maguurtada ah waa in ay waafaqsan yihiin Xeerka Iibka ee Maamulka SSC-Khaatumo iyo dhammaan xeer- nidaamiyeyaashooda.
2. Dhammaan heshiisyada iibka ee Maamulka SSC-Khaatumo waa ballanqaad ay gashay Dowladdu.

3. Iyadoo la tixgelinayo Xeerka, heshiisyada iibka ee soconaya sannado badan waxaa loogu samaynayaa qoondo sannadeed miisaaniyadda la ansixiyay iyadoo lagu sixi karo ku noqoshada miisaaniyadda ama wareejinada madaxyada.
4. Dhammaan heshiisyada ku dhaca xadka loogu dejiyay xeer nidaamiyayaasha Xeerka iibka, waa in uu ogolaadaa, ansixiyaana Xoghayaha Maaliyaddu, waana in uu caddeeyaa. Golaha Fulinta iyo madaxda kale ee hay'adaha maamulka waxay mas'uul ka yihiin ilaalinta diiwaannada heshiisyada la galay iyo in ay miisaaniyadda ku daraan qoondada heshiisyada soconaya sannad ka badan oo ay u doonayaan in la baxsho.
5. Dhammaan heshiisyada la galay waa in ay ka muuqdaan qorshaha iibka ee sannadka ee xafiis kasta iyo Hay'ad kasta oo Dowladeed sida ku qoran Xeerka iibka. Qorshaha iibka ee alaabada iyo adeegyada kala duwan waa in loo diyaariyaa si waafaqsan madaxyada miisaaniyadda noocyada kharashaadka kala duwan loona gudbiyaa Xoghayaha si ay u noqoto caddaymaha qorshaha kharash ee sannadka.

Qodobka 34^{aad}:

Hubinta Balan Qaadyadda

1. Dhammaan kharash bixintu waxay maraysaa habraacyada hubinta ballan qaadyada ee kusoo bixi doona xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan.
2. Hay'adaha dowladdu waxay samayn karaan ballanqaad, bixinna karaan kharashka in le'eg qoondada miisaaniyadooda iyadoo la hubinayo in loo hayo lacag.
3. Ballanqaad waa la geli karaa sannad maaliyadeedkan, haddii ballan qaadku dhaafsiisan yahay hal sannad maaliyadeed, kharashka la bixinayo sannad maaliyadeedka lagu jiro waa in uusan kaa badan qoondada sannadka loo ansixiyay.
4. Haddii aan lagu sheegin xeer-nidaamiye ka farcama Xeerkan, dhammaan ballan qaadyada waa in Xoghayaha ama qof uu u wakiishay laga helaa ogolaansho.
5. Dhammaan ogolaanshaha ballan qaadyada waa inay marka hore hubiyaan in loo hayo qoondo miisaaniyadeed madaxa loo rabo ballan qaadka.

Qodobka 35^{aad}

Kharaj Bixinta Agabka iyo Adeeggyada

1. Wax kharaj bixin ah lagama sameynkaro Miisaaniyadda Maamulka illaa, Intaa waxaa dheer in foojar kasta oo kale ama shahaadada looga baahan yahay xeer-hoosaadka ama tilmaamaha xisaabaadka, Sarkaalka Oggolaadaha Hay'adda in uu caddeeyo;

- a. Lacala hadii lacagta Kharajbixinta hawl lagu qabtay amase adeegga lagu fuliyay:
 - i. Shaqo ayaa la sameeyaa, alaab lasoo iibshay, ama adeeg la baxshay iyo qiimaha lagu qabtay waa in ay noqdaa sida laga soo xigtay heshiiska, ama haddii aan lagu cayimin heshiiska, waa in ay macquul noqdaan;
 - ii. Kharaj bixinta ayaa loo eegayo heshiiska, hadii ay noqoto in la baxsho, kahor inta aan la dhamaynin hawsha, keenidda agabka, ama bixinta adeegga; iyo
 - iii. Sheegashada bixinta waa macquul iyo habraacyada uu qoray Xoghayaha Maaliyadda ayaa la raacayaa, haddii bixinta ay tahay in la sameeyo ka hor xaqiijinta; ama
- b. Hadii ay dhacdo Kharaj bixino kale, lacag bixiyaha waxa uu xaq yeel anayaa bixinta Kharajkaas.
2. Xoghayaha Maaliyadda ayaa diyaarinaya xadka lacag bixinta ee wareega fulinta Miisaaniyadda ee Kharaj bixin horumariska ee la sameyn karo ka hor dhamaadka hawsha, keenidda Agabka, qabashada Adeegga.
3. Wax walba ee Kharaj bixin horumariska ah ee Miisaaniyadda Maamulka ayaa dib loo bixin doonaa amase laga bariyeelayaa inta lagu guda jiro sannad Maaliyadeedka aminkii la baxsho Kharajaadkii la hormarsaday.
4. Sarkaalka kasta ee ogalaadaha ah waxa uu taabagaliyaa diiwaangalinta kharaj walba ee dibadyaal ah isla sida ku cad xeer-hoosaadyadda xeerkan.

Qodobka 36^{aad} Ogolaanshaha Kharaj Bixinta

1. Xisaabiyaha Guud ayaa sameynaya dhammaan Kharaj biximaha ee Miisaaniyadda Maamulka, waxa uuna leeyahay dhammaan awoodaha bixinta kharajyada Hay'adaha Maamulka SSC-Khaatumo isaga oo marinaya kaliya Bankiga SSC-Khaatumo, laguna saaro kharajyada ayadoo la raacaya Khasnadda Maamulka.
2. Codsiga Kharaj bixin kasta waa in uu ansixinayaa Xisaabiyaha Guud lagana diiwaan galiyaa Hanti Dhawrka Guud.
3. Bankiga Maamulka SSC-Khaatumo ayaa mas'uul ka ah bixinta kharajyada ee uu soo xaqiijiyay Xisaabaha Guud iyo saxiixayaal kale ee u Idman Khasnadda Mideysan ee Maamulka.
4. Kharaj bixin walba ee la ogalaaday waa in ay ku lifaaqan yihiin dhamaan qoraaladii kaabaha u ahaa sida lagu qeexay xeer-hoosaadka Xoghayaha diyaarshay.

5. Kharajyada waxa kaliya oo la siin karaa Shirkad diiwangashan. Tani waxaa ku jira bixinta aan Mushaharka ahayn Kharajyada Socdaalka, shakhsiyaadka kale ee mar hore ka qaadan jiray Miisaaniyadda Maamulka mushahar, gunno, hawlgab ama magdhow. Ganacsatadda ayaa lagu diiwangalinayaa Xafiiska Xisaabiyaha Guud sida ku cad Xeerka Iibka Maamulka.

Qodobka 37^{aad}

Kala wareejinta Qoondooyinka Miisaaniyadda Maamulka SSC-Khaatumo

1. Kadib ansixinta Miisaaniyadda, lacag wareejin kasta ee miisaaniyadda dhexdeeda ah waa in ay waafaqsan tahay Xeerka miisaaniyadda.
2. Wadarta kala wareejinnada miisaaniyadda, waa in lagu warbixiyaa ama lagu xusaa warbixinta Xoghayaha Maaliyadda ee 3 biloodlaha ah.
3. Lacag lagama wareejin karo madax mushaar iyadoo loo wareejinayo madax kharash ee kale.
4. Dhammaan kala wareejinnada sannad maaliyadeedka waa in uusan ka badan 10% qoondadii kharashka ee miisaaniyadda.
5. Wixii ka bata qoondadii miisaaniyadda ee la ansixiyay oo aan laga buuxin Karin kala wareejinnada waa in lagu daraa kabka miisaaniyadda ee sannadka dhexdiisa la sharciyeeyo iyadoo la sheegayo madaxa lacagtaas laga soo wareejinayo iyo isbedellada ay ku keenayso madaxyada kale.

Qodobka 38^{aad}

Dhicitaanka Qoondooyinka Dabayaaqada Sannad Maaliyadeedka:

1. Dhammaan qoondooyinka aan la isticmaalin iyo dhammaan qaybihii miisaaniyadda ee aan la ballan-qaadin, waxa ay dhacayaan dhammaadka sannad Maaliyadeedka.
2. Dhammaan haraaga qoondooyinka la ballan qaaday balse aan la bixin ka hor sannad Maaliyadeedka dhammaadkiisa waa la haynayaa si loogu bixiyo balanqaadyadaas muddo ku siman soddon (30) maalmood laga bilaabo dhammaadka sannad maaliyadeedkii hore. Wixii xilligaas ka danbeeya waxaa loo wareejinayaa xisaabta midaysan ee Maamulka SSC-Khaatumo. Diiwaan gelinta, xisaabinta iyo warbixinta lacagaha aan la bixin waxaa lagu qeexayaa xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan waafaqsanna qodobada 40,41 iyo 42 ee Xeerkan.
3. Si loo fududeeyo xisaabta iyo iswaafajinta khasnadda Midaysan, waa in Xoghayaha Maaliyaddu abuuraa xisaab cusub bilowga sannad walba lagu ururinayo dakhliga sannadkaas. 30 maalmood kadib dhammaadka sannadkii hore, dhammaan xisaabihii loo furay sannadkii hore waa in la xiraa, wixii haraa ah oo ku jira xisaabahaas waa in loo wareejiyaa xisaabaha cusub ee loo furay saannadka cusub.

AMAAHDA, DAMAANAD QAADKA MAAMULKA IYO MAAMULKA
GARGAARKA

Qodobka 39^{aad}

Deymaha Maamulka SSC-Khaatumo

1. Iyadoo la ilaalinayo xadka awoodeed ee Golaha barlamaanku ogolaaday xilliga ay ansixinayaan miisaaniyadda Maamulka SSC-Khaatumo ama xilli kaleba sannadka gudihiisa, Xogahayaha oo kaliya ayaa leh awoodda soo dayn qaadashada si waafaqsan xeer nidaamiyeyaal u gaar ah daymaha oo ka farcamaya Xeerkan. Waxaa ku jira daymaha dalka gudihiisa iyo dibedaba, sidoo kale deymo la xiriira isticmaal hantida Maamulka SSC-Khaatumo iyo kuwo wakhtigoodu gaaban yahay.
2. Xogahayaha Maaliyada wuxuu soo saarayaa tilmaamo caddaynaya shuruudaha heshiisyada daymaha.
3. Xogahayaha Maaliyada isagoo la tashanaya Bankiga Maamulka SSC-Khaatumo, waa inuu soo saaraa tilmaamo gaar ah sida loo qaadan karo daymaha gudaha ee dowladdu qaadanayso.
4. Waa in la aasaasaa Guddiga Maamulka Daymaha oo ka kooban Xogahayaha Maaliyadda oo guddoomiye ah, Guddoomiyaha Bankiga, Xogahayaha Arrimaha Bulshada, Hantidhowrka iyo Gudoomiyaha Gudidda Maaliyada Golaha dhexe .
5. Dhammaan heshiisyada daymaha Maamulka SSC-Khaatumo waa in ay soo ogolaadaan Guddiga Maamulka Daymaha uuna saxiixaa Xogahayaha isagaa ka wakiil ah Maamulka SSC-Khaatumo inta aan ka ahayn daymaha gudaha oo uu Bankigu mas'uul ka yahay isagoo la tashanaya Xogahayaha.
6. Dhammaan lacagaha ku yimid magaca daymaha waa in lagu xereeyaa Khasnadda Midaysan ee Maamulka SSC-Khaatumo inta aan ka ahayn daymaha ay si toos ah dayn bixiyeyaashu ugu shubaan shirkado dowladdu wax kasoo iibsatay ama shaqo u qabatay iyo daymaha ay soo qaateen shirkada ganacsi ee dowladdu leedahay iyo hay'adaha kale ee madax bannaan ee aan si toos ah u hoos imaan Maamulka SSC-Khaatumo sida waafaqsan nidaamka xisaabeed ee Maamulka SSC-Khaatumo.

Qodobka 40^{aad}
Dammaanadaha Maamulka

1. Sida ku cad qodobka 37 farqadiisa (4) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyo Maamulka SSC Khaatumo waxay awood u leedahay inay damanaq qaad ka samayso dhulka ay ka taliso.
2. Xoghayaha Maaliyadda ayaa uga wakiil ah Maamulka wixii damaanad qaad ah, daymaha gaarka u ah shikadaha ganacsi ee dowladdu leedahay, ama Xafiiskaha iyo hay'adaha kale ee Maamulka in aanay ka badnayn caddadka uu Golaha Dhexe u ogolaaday xilligii ansixinta Miisaaniyadda. Dhammaan damaanadaha daymaha waa in ay soo ogolaadaan Guddiga Maamulka Deymaha iyo Xoghayaha Maaliyadda. Xogta ogolaanshaha damaanadaha waxaa lagu faahfaahinayaa xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan.
3. Dhammaan heshiisyada ay ku jiraan ballan qaad sababi kara qaan maaliyadeed oo Maamulka ku iman karta ama shirkad ganacsi oo dowladdu leedahay waa inay ogolaadaan Xoghayaha Maaliyadda iyo Guddiga Maamulka Daymaha. Qaamaha maaliyadeed waxaa ka mid ah;
 - a. Damnaanad qaad shaqo la qabanayo ama lacag la bixinayo oo qof ama hay'ad sameeyeen.
 - b. Heshiis kasta ama heshiis ballanqaad inaan waxba la yeelin qof ama hay'ad ama mag dhow loo sameeyo hadii wax ku yimaaddaan, ama ka ilaalin in wax ka lumaan.
 - c. Ballanqaad kasta oo dhaqaale lagu siinayo hay'ad ama qof oo ay ku jirto faa'iido, lacag ama manaafacaad laga helo maalgashi.
 - d. Heshiis kasta oo u ballan qaadaya caawinaad dhaqaale qolo kale oo la xiriirta shaqooyin cayiman oo ay qabanayaan qoladaas kale.
 - e. Heshiis kasta oo kale oo lagu sheegay xeer-nidaamiyeyaasha ka farcamaya Xeerkan.
4. Diiwaanka dammaanadaha lagu bixiyay waa in uu hayaa Xisaabiyaha Guud, kuna jirtaa warbixinada sannadlaha ee Sanduuqa Mideysan.
5. Shirkadaha ganacsi iyo kuwa madaxa bannaan ee aan hoos imaanaynin Maamulka SSC-Khaatumo laakiin ay dammaanad u samaysay, waa inay Maamulka ugu soo celiyaan wixii maaliyad ah qaab iyo xilli uu Xoghayaha Maaliyadda amray. Waxaa ku jira lacagahaas dhammaan caddadka ay Dowladdu ku bixisay dammaanadaas iyo dhammaan kharashka la xiriira dammaanadaas.
6. Qaabka meel marinta, kormeerida iyo bixinta dammaanadaha waxaa lagu soo saarayaa xeer-nidaamiya ka farcama Xeerkan.

Qodobka 41^{aad}

Haykalka Maareynta Deeqaha iyo Waajibaadka Hay'adah aan Dowliga ahayn

1. Dhammaan hay'adaha hela deeqaha dibedda loona soo dhex mariyo Miisaaniyadda, waa inay u soo gudbiyaan Xoghayaha Maaliyadda dhammaan nuqulada heshiisyada dhex maray hay'adda iyo deeq bixiyeyaasha iyo isfahamka dhex maray muddo 7 maalmood gudohood.
2. Hay'adaha aan Dawliga ahayn ee fuliya mashaariic mid horumarineed iyo mid bani-addamnimo ee laga maalgeliyo lacagta Maamulka, ayna ku jirto lacagta deeq-bixiyeyaasha, waxa masu'iyadda lagula xisaabtamayaa Sarkaalka Idman ee Hay'addaas, wuxuuna ku soo gudbinayaa warbixin-maaliyadeed sannadlaha ee baadhista maray. Xeer-nidaamiye ayaa qeexaya foomamka, asluubta, iyo shuuruudaha aasaasiga ah ee Hay'adaha aan Dawliga ahayn ee laga rabo.
3. Dhammaan heshiisyada deeqaha Hay'adaha Maamulka, kuwa aan Dawliga ahayn iyo hay'adaha ganacsiga ee Maamulka waa in laga diiwan geliyaa Xisaabiyaha Guud si loogu soo daro Xisaab-Xirka sannadka ee Maamulka.

Qodobka 42^{aad}

Warbixinnada Amaahda Wakaaladaha iyo Hay'adaha Maamulka

1. Wakaaladaha/Sharikadaha Dowladdu leedahay iyo Bangiyada Maamulkaba waxay qaadan karaan daymo muddadoodu yar tahay, iyo mid muddada dhexe ah ba oo ay ku iibsadaan hanti ama u isticmaalaan kharashka joogtada ah kadib markay ka helaan ogolaansho cad, Guddiga daymaha oo ogolaansho qoraal ah ka samaynaya. Golaha Dhexe wuxuu si fiican u eegayaa xadka amaahda uu Xoghayahu u ogolaaday Wakaaladahaas/Hay'adahaas xilliga la ansixinayo Miisaaniyadda sannadka.
2. Wakaaladaha/Sharikadaha Dowladdu leedahay (State- owned enterprise) iyo Bangiyada Maamulka ma u samayn karaan dammaanad amaahda ay ku leeyihiin qandaraasle/shirkado ay wax kasoo iibsadeen hadaan la helin ogolaansho madaxda sare ee Hay'adda iyo Guddiga Maamulka Daymaha iyo Xoghayaha Maaliyadda.
3. Wakaaladaha/Sharikadaha Dowladdu leedahay iyo Bangiyada Maamulka waa inay iska bixiyaan wixii amaah ah 90 maalmood laga bilaabo taariikhda ay waajibtay dayntaas haddaan la hayn heshiis sheegay xilliyada la bixinayo daynta. Amaahda bixinteedu dhaafto 90 maalmood waxaa loo aqoonsanayaa dayn waxayna u baahan tahay ogolaansho madaxda sare ee Wakaaladaas, Xoghayaha Maaliyadda iyo Guddiga Maamulka Daymaha.
4. Wakaaladaha/Sharikadaha Dowladdu leedahay iyo Bangiga Maamulka waa in ay ka doontaan ogolaansho madaxdooda sare iyo in aysan Xoghayaha Maaliyadda iyo Guddiga Maamulka Daymaha waxba ka qabin qorshohooda daymaha bilowga sannad maaliyadeedka, sidoo kale hadday qorsheynayaan dib u habayn daymihii hore oo lagu muujinayo qorshohooda kharash ee sannadkaas.

5. Wakaaladaha/Sharikadaha Dowladdu leedahay iyo Bangiyada Maamulka waa in ay u gudbiyaan Xoghayaha Maaliyadda 3dii biloodba warbixin faahfaahsan ee daymaha ay qabaan oo ay ku jiraan daymaha ay Dowladdu dammaanad qaaday, daymaha ay bixintooda dib u habayn ku sameeyeen, amaahda ay kasoo qaateen qandaraaslayaasha ama shirkado ay wax ka iibsadeen oo dhaafay 90kii cisho, sida ay u bixinayaan ama u bixiyeen.
6. Waajibaadka daymaha, daymaha dib u habayn lagu sameeyey, iyo warbixinnada daymaha ee Wakaaladaha iyo Bangiyada Maamulka waxaa lagu sii faahfaahinayaa xeer-nidaamiye kasii farcamaya Xeerkan.

Qodobka 43^{aad}

Diiwaangelinta iyo Warbixinta Daymaha Maamulka

1. Guddiga Daymaha waxaa laga rabaa inuu hayo diiwaan ay ku dhan yihiin dhammaan Daymaha Maamulka, oo ay ku jiraan dammaanadaha. Diiwaannada iyo magacyada dadka/shirkadaha daymaha kuleh Maamulka waxaa haynaya Bangiga Dawladda.
2. Amaahda ururtay ee ay leeyihiin qandaraaslayda/shirkadaha ee dhaafay xilligii bixinta welina ku taagan Maamulka sannadka dhamaadkiisa, waxaa loo tixgelinayaa dayn loona diiwaan gelinayaa dayn ahaan, qorshaha bixinteeda waxaa lagu darayaa warbixinta.
3. Sannadkii laba jeer, Xoghayaha Maaliyadda wuxuu diyaarinayaa una gudbinayaa warbixin Hogaamiyaha iyo Golaha Dhexe xogaha daymaha cusub ee loo baahan yahay, qorshaha bixinta daymaha, daymaha u baahan in bixintooda dib u habayn lagu sameeyo, daymaha aan loo baahnayn in la bixiyo oo la tirtirayo iyo kuwa wakhtigoodii dhammayday, Xoghayaha Maaliyadda wuxuu diyaarinayaa soona daabacayaa daymaha ku taagan Maamulka iyo qorshaha bixintooda ee muddada dhexe.
4. Dhammaan daymaha, hantida maaliyadeed ama qaamaha maaliyadeed waa in uu diiwaan geliyaa Xisaabiyaha Guud lagana warbixiyaa sannad walba iyagoo qayb ka ah Xisaab-Xirka Maamulka ee waafaqsan nidaamka xisaabaadka ee uu Xeerkan tilmaamayo.
5. Waa in Xoghayaha Maaliyadda hubiyaa in ay jirto nidaam loo dejiyay daymaha oo casriyayn lagu sameeyo mar walba laguna daabacayo warbixinada kala duwan, shuruudaha kala duwan ee daymaha iyo dammaanadaha kala duwan ee ay Maamulku samayso.

Qodobka 44^{aad}**Maamulka Lacagta Naqadiga ah (Cash)**

1. Xisaabiyaha Guud ayaa mas'uul ka ah hubinta, in si taxadar leh, sida ugu dhaqaalaha badan uguna kharash yar ay Maamulku u isticmaasho lacagta Maamulka.
2. Waa in Xisaabiyaha Guud uu hayo lacag ku filan dhammaan kharashaadka soo maray nidaamka kharash bixinta waafaqsan Miisaaniyadda.
3. Waa in xeer-nidaamiye ka farcama Xeerkan laga soo saaraa sida ugu wanaagsan ee Dowladu u isticmaalayso lacagta. Xeer-Nidaamiyaha waa inuu;
 - a. Awood siiyaa in Xoghayaha Maaliyada uu ka dalban karo dhammaan hay'adaha
 - b. Maamulka macluumaadka la xiriira isticmaalka iyo maamulka lacagta
 - c. Amro Xoghayaha Maaliyada in uu sameeyo qaabka maamul ee lacagta ee laga doonayo in Hay'ad walba ku dhaqanto
 - d. Siiyo Xoghayaha Maaliyada awood uu ku heli karo macluumaadka xisaabaadka u furan hay'adaha Maamulka oo dhan.
 - e. U ogolaado in Xoghayaha Maaliyada la socodsiiyo Bangiga Maamulka qorshaha amaah lacageed oo dabooli karta baahida lacageed. Xoghayaha Maaliyada iyo Bangigu waa in ay ka wada shaqeeyaan maamulo lacagaha sannadka dhexdiisa.

Qodobka 45^{aad}**Habeeynta Bangiga**

1. Nidaamka Bangiga ee Maamulka waa in ay ku shaqeeyaan mabaa'diida Khasnadda Midaysan taasoo ujeedadu tahay in xisaabaha Maamulka Maamulka SSC-khaatumo oo dhan ay la mideeyo.
2. Hay'adaha Maamulka looma furi karo Xisaab Bangi, ha ahaato mid dalka gudihiisa ama dibeddiisa ah, iyada oo aan ogollaansho qoraal ah laga haysan Xisaabiyaha Guud.
3. Xisaabta guud ee Maamulka waxaa laga furayaa (xarunta dhexe) ee Bangiga Maamulka Maamulka SSC-khaatumo, kaasoo dhammaan dakhliga lagu xeraynayo, kharashkana laga bixinayo.
4. Xoghayaha Maaliyada isagoo la tashanaya Bangiga Maamulka wuxuu ogolaan karaa furista xisaabo laga furo Bangiga Maamulka SSC-khaatumo iyo Bunuugta gaarka loo leeyahay ee dalka gudihiisa iyo dibediisaba kuwaasoo u sahlaya Maamulka inay usoo maraan lacagaha lagana bixiyo wixii lacag bixin ah ee loo baahdo. Macluumaadka maamulka bunuugtan waxaa lagu soo saarayaa xeer-nidaamiye ka farcama Xeerkan.

5. Habraacyo lagu furayo, xirayo ama looga shaqaynayo xisaabaadka Bangiga Maamulka waxaa lagu soo saarayaa xeer-nidaamiye ka farcama Xeerkan. Xoghayaha Maaliyada wuxuu kaloo soo saarayaa awaamir iyo hagayaal lagu maamulo xisaabaadka Bangiga.

QAYBTA 7^{aad}

XISAABAADKA IYO WARBIXINTA

Qodobka 46^{aad}

Xisaabaadka

1. Maamulku waa in ay u hogaansamaa halbeegyada Xisaabaadka iyo Hantidhawrka ee lagu taliyey ama ay soo saareen hay'adda sharciyaynta ee Soomaaliya.
2. Halbeegyada xisaabaadka waa in loo isticmaalaa dhammaan xisaabaadka heer walba ee Maamulka sida ku xusan Xeerkan iyadoo la tixgelinayo si joogto ah habraacyada ay isku waafaqeen Maamulka SSC-khaatumo iyo Dowladda Federaalka. Shirkadaha ay Dowladdu leedahay waa inay waafaqsan yihiin Halbeegyada xisaabaadka ee Dowladuhu isku raacaan.
3. Diiwaanada xisaabaadka waxaa la isticmaalayaa nidaamka lacagta (Cash Basis), diiwaan gelinta dhammaan dakhliga iyo kharashka ee Maamulka, waxaa loo kala saarsaarayaa madaxyada shaxda xisaabaadka ee la isla qaatay waana inuu waafaqsan yahay mabda'a loo yaqaan xeraynta labada dhinac (Double Entry Principles).
4. Diiwaanka xisaabaadka Maamulka SSC-Khaatumo waa in lagu kaydiyaa Aaladda elektaroonigga ee Nidaamka Maareynta Maaliyadda Isku-dhafaan (Integrated Financial Management System).
5. Waa in la diiwaan geliyaa hantida maaliyadeed, kuwa sugan iyo kuwa aan sugnayn, qaanta/amaahda/daymaha lagu leeyahay Maamulka heer degmo, gobol, Xafiiskaha iyo hay'adaha kale ee Maamulka.
6. Diiwaannada xisaabaadka oo dhan waa in la kaydiyaa 7 sannadood. Haddii ay diiwaannadu ahaayeen elektaroonic waa in ay jiraan nuqullo gacanta lagu hayo si hadday qeyb la waayo loo soo ceshan karo xogta. Nidaamka xisaabaadka ee (IFMIS) waa in la ilaaliyaa, la dayactiraa si wixii xog ah loo heli karo muddo 7 sano ah.
7. Halbeegyada Xisaabaadka ee Maamulka SSC-khaatumo waa inuu waafaqsanaadaa nidaamka lacagta caddaanka ah ee ay amreen ururada loo xilsaaray soo saarista halbeegyada Xisaabaadka ee Maamulka. Iyadoo ay amar tahay in la raaco halbeegyadaas. Xafiiska iyo hay'adaha kale ee Maamulka waxay kaloo ka warbixinayaan hantida lacageed, daymaha lacageed iyo daymaha lacageed oo qaantoodu ku xiran tahay dhacdo kale.
8. Xoghayaha Maaliyaddu isagoo la tashanaya Hantidhawraha Guud waa inay soo saaraan xeerarka xisaabaadka ee laga rabo inay Dowladdu u isticmaasho xisaabaadka. Waxaa lagu soo saarayaa xeer-nidaamiye u gaar ah oo ka farcamaya Xeerkan iyo habraacyo iyo tilmaamo kale oo uu Xoghayaha Maaliyaddu soo saaro.

9. Xeeraka xisaabaadka waa in lagu xusaa habraacyo gaar u ah hantida dalka kusoo gasha deeq ahaan oo aan soo marin nidaamka maaliyadeed ee Maamulka.
10. Xoghayaha Maaliyaddaisagoo la tashanaya Xisaabiyaha Guud waa in ay soo saaraan shaxda xisaabaadka (Chart of Accounts) oo waafaqsan qaabka qoondada Miisaaniyadda loo kala saarsaaray sida Xeerkan iyo xeer nidaamiyeyaashiisu sheegayaan.
11. Xoghayaha Maaliyaddu waa inuu aasaasaa xarun dhexe ee xisaabaadka taasoo shaqooyinkeeda lagu qeexi doono xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan. Madaxan ama xaruntan waxay hoos imaanaysaa Xisaabiyaha Guud.
12. Xoghaye iyo madax walba ee hay'ad miisaaniyad leh waxay mas'uul ka yihiin iyagoo raacaya amarka Xoghayaha, inay ka dhex aasaasaan Xafiiskooda ama Haya'adooda, qayb qaabilsan xisaabaadka, sida ay farayaan xeer-nidaamiyeyaasha, tilaamamaha iyo habraacyada ka farcama Xeerkan.
13. Xoghaye iyo madax kasta ee Hay'ad Dowladeed oo leh qoondo maaliyadeed ayaa mas'uul ka ah ilaalinta kaydka dukumentiyada xisaabeed iyo xafidaadooda haday yihiin waraaqo iyo elektaroonik la xiriira dhacdooyinka maaliyadeed qaabka iyo xilliga lagu sheegay xeer-nidaamiyeyaasha iyo xeerkanba.

Qodobka 47^{aad}

Warbixinada Xisaabaadka

1. Waa mas'uuliyad guud ee xeerkani farayo dhammaan saraakiisha Maamulka ee gacanta ku haya xisaabaadka maaliyadda in warbixinada xisaabaadka/maaliyadda ay u gudbiyaan si deg deg ah, waxba aysan ka maqnayn, wax khalad ahna aysan ku jirin sida Xeerkan ku qoran iyo xeer-nidaamiyeyaasha ka farcama iyo tilmaamayaasha kale ee Xoghayaha Maaliyaddu soo saaro.
2. Haya'ad walba oo leh qoondo miisaaniyadeed waxaa laga rabaa in ay u gudbiyaan Xoghayaha Maaliyadda warbixin ku saabsan dakhliga bil walba iyo kharashka 3dii bilood oo loo barbardhigay qoondadii Miisaaniyadda ee xilligaas, iyadoo la raacayo wakhtiga iyo qaabka lagu sheegay xeer-nidaamiyeyaasha Xeerkan ka farcamay.
3. Dhammaan hay'adaha leh qoondo kharash waa in ay u gudbiyaan Xoghayaha Maaliyadda sadexdii biloodba, xisaab-xirrada Xafiiskaas/hay'addaas oo ka kooban, warbixinta qulqulka lacagta caddaanka ah, warbixinta dakhliga iyo kharashka ee khasnadda midaysan, iyo warbixinta hantida iyo qaamaha ee dhammadka 3daas bilood iyo wixii kale oo faahfaahin ah oo lagu sheegi doono xeer-nidaamiyeyaasha ka farcamaya Xeerkan.
4. Iyadoo la raacayo xogta laga helay hay'adaha leh qoondada miisaaniyad, Xoghayaha Maaliyaddu waa in uu soo saaraa warbixin isu geynaysa dhammaan warbixinadaas 3 biloodka ah, isuna barbardhigaysa, sida kharashka loo fuliyay, dakhliga loo ururiyay iyo qiyaastii Miisaaniyadda Maamulka. Warbixintaas waa in loo gudbiyaa Hogaamiyaha, Golaha Dhexe iyo Muwaadiniinta muddo aan ka badnayn 45 maalmood kadib dhamaadka 3da bilood ee warbixintu ku saabsan tahay. Qaabka warbixinta 3 biloodka waxaa lagu sheegayaa xeer-nidaamiyeyaasha ka farcama Xeerkan.

Warbixinada Sannadka Gudahiisa

1. Sarkaal Idman oo kasta ee Hay'adaha Maamulka waa in uu warbixin bille ah oo ku saabsan dakhliga iyo Kharashka u soo gudbiyaa Xisaabiyaha Guud muddo toddoba maalmo-shaqo gudahood, marka bishu dhammaato iyadoo la raacayo qaabka uu caddeeyey Xisaabiyaha Guud.
2. Sarkaal Idman oo kasta ee Hay'adaha Maamulka waa in uu warbixin 3 biloodle ah u soo gudbiyo Xisaabiyaha Guud, xisaabaadka Hay'adaha Maamulka oo ay ka mid yihiin Warbixin Xisaabeedka qulqulka lacagta cadaanka ah, kashfiga xisaabta dakhliga iyo Kharashka ee Sanduuqa Mideysan ee Warqadda Miisaanka (Balance Sheet) oo ay ku lifaaqan tahay kuna caddahay raasumaalka iyo daymaha lagu leeyahay dhammaadka rubuclaha, iyo wixii tafaasiil kale ee uu amro in lagu dhaqmo Xisaabiyaha Guud.

Qodobka 49^{aad}

Warbixin Maaliyadeed ee Sannadke (Annual Financial Statement) iyo Baadhitaanka Dibedda (External Audit)

1. Warbixin-Maaliyadeed ee Sannadka waa in la diyaariyaa si waafaqsan xeerarka xisaabaadka ee Maamullku qaadatay. Warbixin-Maaliyadeedka Sannadka ee Maamulka SSC-khaatumo waxay isu gaynaysaa dhammaan warbixinnada hay'adaha Maamulka sida ku qeexan xeerkan.
 2. Warbixin-Maaliyadeedkan waxaa kamid ah;
 - a. Xaashida dheelitirka (Balance Sheet) oo ay ku lifaaqan tahay kuna caddahay raasumaalka iyo daymaha lagu leeyahay
 - b. Qulqulka lacagta naqdiga ah oo muujinaysa, dakhliga iyo kharashka iyadoo si kooban gaar loogu muujinayo dakhliga iyo kharashka hawl socodsiinta, kharashka lagu soo iibsado hantida maguurtada ah iyo
 - c. Is barbar-dhigga Miisaaniyadda Maamulka nuqulkii hore, nuqulkii dib loogu nooqday ee lagu saaray kabka miisaaniyadda iyo kala wareejinnada iyo sida ay wax u dheceen.
 - d. Warbixinta hantida iyo daymaha oo loo kala saarsaaray qaab fududaynaya fahamka hantida iyo deymaha.
 - e. Warbixinta habraacyada iyo siyaasadaha xisaabaadka.
 - f. Warbixin sii faahfaahinaysa xisaabaadka meelaha lasoo koobay iyo deeqaha soo gala Maamulka SSC-khaatumo meelaha ay ka kala yimaadeen.
3. Xisaabiyaha Guud waa in uu diyaariyo Warbixin Sannad-Maaliyadeed ee aan baaris marin, una gudbiyo Hanti Dhowraha Guud muddo aan afar bilood ka badnayn ka dib dhammaadka sannad maaliyadeedkaas. Warbixin- Maaliyadeedka Sannadka ee aan la baarin waa in lagu daabacaa mareegta Xafiiska Maaliyadda 4 bilood kadib dhammaadka sannadka si shacabku ula socdaan.

4. Hay'adaha Maamulka iyo Hay'adaha qoondo ku leh miisaaniyadda waa in ay diyaariyaan una gudbiyaan Xisaabiyaha Guud iyo Xoghayaha Maaliyadda Warbixin Sannad- Maaliyadeed si ay ugu daraan warbixinta guud ee Maamulka. Dhammaan hay'aduhu waa in ay kharashkooda ku daraan khidmadda Hantidhawrka ee baarista loogu sameeyey. Qiimaha baarista ee Hantidhawrka waxaa jaangoynaya Golaha Dhexe isagoo la tashanaya Hantidhawraha Guud xilliga la diyaarinayo miisaaniyadda Xafiiska Hantidhawrka Guud.
5. Xisaabaadka Xafiiska Hantidhawraha Guud waa in ay baaris ku sameeyaan, ugu yaraan hal mar Sannad Maaliyadeedka, shirkad sumcad leh xirfaddooduna tahay Hantidhawrnimo, taas oo ay soo dirayaan Golaha Dhexe iyagoo kula heshiinaya xadka shaqada iyo qiimaha ay ku qabanayaan. Khidmaadda shirkaddan waxaa laga bixinayaa miisaaniyadda Xafiiska Hantidhawrka Guud.
6. Hanti Dhowraha Guud waa in uu baaris ku sameeyo Warbixin Sannad- Maaliyadeedka una gudbiyaa Golaha Dhexe Warbixinta Baarista oo ay ku lifaaqan tahay Warbixin Sannad- Maaliyadeedka, waana in aanay laba bilood dib uga dhicin marka laga soo bilaabo markii uu helay Warbixin Sannad- Maaliyadeed ka ee aan baarista soo marin. Warbixinta Hantidhawrka waa inay ka muuqataa jawaabaha iyo sababynta Xoghayaha Maaliyaddawaxyaabaha uu Hantidhawruhu ka soo qoray Warbixin- Maaliyadeedka ay soo gudbiyeen Xafiiska Maaliyadda.
7. Hanti Dhowraha Guud waa in uu ku faafiyo warbixinta baarista faafinta rasmiga ah si caam ahna loogu bandhigo Dadweynaha hal bil ka dib marka uu Warbixintiisa u gudbiyo Golaha Dhexe sida ku cad Xeerka Hanti Dhowrka Guud qodobka 13aad farqadda 1aad iyo 2aad.
8. Marka uu Hanti Dhowraha Guud u gudbiyo warbixintiisa Golaha Dhexe sida ku xusan Xeerkan, waa in uu Xisaabiyaha Guud isna faafiyo warbixinta baadhista Warbixin- Maaliyadeed Sannadlaha ah.

CUTUBKA 8^{AAD} HANTIDHOWRKA

Qodobka 50^{aad}

Hantidhawrka Gudaha (Internal Audit)

1. Ujeedada ugu weyn ee qaybta Hantidhawrka Gudaha waa in ay hormariso, ilaalisana wixtarka Hay'adaha Maamulka, iyagoo u qabanaya xaqiijin madax bannaan, talo, iyo aqoon ka caawinaysa gudashada waajibaadkooda sharci iyo mid maaliyadeed taas oo u samaynaysa qiimayn madax bannaan oo nidaamsan oo lagu eegayo in maamulka khataraha, kantaroolada iyo habraacyada maamul ay u shaqaynayaan sidii loogu talo galay.
2. Hay'ad kasta oo dowladeed waa in qaab dhismeedkeedu ku jiraa qayb qaabilsan Hantidhawrka Gudaha si waafaqsan nidaamka Shaqada iyo Shaqaalaha Maamulka.

3. Madaxa Hantidhawrka Gudaha waa in ay ka madax bannaan tahay shaqooyinka kale ee la baaro, waxay awood u leeyihiin in ay helaan macluumaad kasta oo ay u baahdaan, gelina karaan xafiis walba, lana kulmi karaan sarkaal walba oo shaqo uga xiran tahay iyagoo gudanaya waajibaadka loo xilsaaray.
4. Saraakiisha idman waa in ay xaqiijiyaan in Madaxa Hantidhawrka Gudaha ay u dhamaystiran yihiin agabka iyo wixii kale ee ay u baahan yihiin si ay u fuliyaan shaqooyinkooda.
5. Madaxa Hantidhawrka Gudaha ee Hay'ada walba waa in uu ka mid noqdaa maamulka saree e Hay'adaas.
6. Hantidhawrka Gudaha waa in uu shaqo ahaan hoos tagaa Xoghayaha Maaliyadda iyo Agaasimaha Guud, mas'uuliyad ahaanna uu hoos tago Guddiga Sare ee Hantidhawrka Maamulka isagoo usii maraya Madaxa Hantidhawrka Gudaha ee Maamulka.
7. Hantidhawraha Gudaha ee Maamulka waa in uu:
 - a. Qiimeeyaa qaabka loo maamulo xisaabaadka, koontaroolka mas'uuliyadaha iyo hawl fulinta hay'adaas.
 - b. Qiimeeyaa waxtarka Talana ku darsadaan horumarinta habraacyada maamulka khataraha ee hay'adaas.
 - c. Ka warbixiyaa waxtarka iyo hufnaanta ee dhaqaalaha barnaamijyada ka socda hay'adaas.
 - d. U sameeyaa talo soo jeedin ku saabsan sida loo xallinayo cilladaha jira Xoghayaha Maaliyadda hay'adaas ama madaxda hay'adaha madaxa bannaan ogaysiiyaana Xoghayaha Maaliyadda.
8. Inta uu hantidhawruhu ku guda jiro waajibaadkiisa, wuxuu leeyahay awood aan xad lahayn uu ku helayo macluumaadka iyo hantida uu baarayo waana in la siiyaa wixii sharraxaad ah oo uu baahdo.
9. Xafiiska Hantidhawrka Gudaha waa in uu diyaariyaa qorshaha shaqo ee xafiiska ee sannadka taasoo lagu salaynayo khataraha maaliyadeed ee hay'adaas.
10. Xafiiska Hantidhawrka Gudaha waa in uu qorshaha shaqo u gudbiyaa Agaasimaha Guud iyo Xoghayaha Maaliyadda, Guddiga Hantidhawrka Maamulka iyo Madaxa Hantidhawrka Gudaha ee Maamulka.
11. Hantidhawraha Guud waa inuu helaa nuqullo dhammaan warbixinnada ay diyaariyeen Hantidhawrayaasha Gudaha jooga hay'adaha Maamulka.
12. Faahfaahin dheeraad ah ee dhanka shaqada, baaxadda shaqada oo faahfaahsan, mas'uuliyadda warbixinada, shaqooyinka Hantidhawrayaasha Gudaha, waa in lagu sii qeexaa xeer-nidaamiyeyaal ka farcamaya Xeerkan oo ay weheliyaan tilmaamo iyo amaro uu soo saaro Xoghayaha Maaliyadda.

Qodobka 51^{aad}**Maaraynta maamulka Maaliyadda ee Xeerkan**

1. Wakaaladaha iyo Sanduukhyada Gaarka ah ee hoos yimaadda Maamulka SSC-Khaatumo waa inay ku dhaqmaan nidaamka maamulka maaliyadeed iyo sannad maaliyadeedka Maamulka
2. Wakaaladaha iyo Sanduukhyada Gaarka ah waa in loo diiwaan geliyo dhammaan xisaabaadka Wakaaladdaas ama Sanduukhaas sida uu qabo habaacyada iyo xeer nidaamiyayaasha Xeerkan farayaan.
3. Wakaaladaha, shirkadaha iyo Sanduukhyada Gaarka ah waa inay xisaab-xirka sannadlaha ah u gudbiyaan Xisaabiyaha Guud, Xoghayaha Maaliyadda iyo Hantidhawraha Guud laba bilood kadib dhammaadka sannad maaliyadeedka.

Qodobka 52^{aad}**Soo Gudbinta Dhamaystirka Miisaaniyadda ee Wakaaladaha iyo Sanduukhyada Gaarka ah**

1. Wakaalad walba iyo Sanduukh Gaar ah oo walba waa inay u gudbiyaan Xafiiska Maaliyadda ugu yaraan afar (4) bilood ka hor bilowga Sannad Maaliyadeedka Maamulka:
 - a. Miisaaniyadda ay codsanayaan oo loo diyaariyay qaabka ay Xafiiska soo jeedisay. Xoghayaha Maaliyaddu waa inuu qiimeeyaa Miisaaniyadda la soo gudbiyay lana socodsiiyaa Hogaamiyaha iyo Golaha Dhexe.
 - b. Warbixin sheegaysa deeqaha la filayo sannad maaliyadeedka, ilaha ay ka imanayaan iyo ujeedadooda.
 - c. Warbixin sheegaysa daymaha ku taagan oo ay ku jiraan daymaha shirkadaha wax laga soo iibsaday.
2. Waa in Xoghayaha Maaliyaddu ogaysiiyaa Wakaalad walba iyo Sanduukhyada Gaarka ah go'aanka ugu danbeeya ee codsigoodii Miisaaniyadda xilliga laga wada hadlayo qoondada Miisaaniyadda, kana codsadaan in ay ku noqdaan oo ay soo gudbiyaan qiyaas cusub oo waafaqsan inta la isku raacay.

Qodobka 53^{aad}**Warbixinta Sannadka Gudhiisa iyo Warbixin- Maaliyaddedka ee Wakaaladaha/Sharikadaha Maamulka**

1. Wakaaladaha/Sharikadaha ee Maamulka waa in ay soddon (30) maalmood gudahood ka dib dhammaadka saddexdii bilood kasta u soo gudbiyaan Warbixin Maaliyadeedkooda Xisaabiyaha Guud iyada oo la raacayo qaabka uu tilmaamay xeer-nidaamiyayaasha iyo habaacyada kale ee uu Xoghayaha Maaliyaddu soo saaray sida ku cad Xeerkan. Warbixin Maaliyadeedkan waa in ay isu barbardhigtaa dakhliga iyo kharashka lagu qoondeeyey Miisaaniyadda sannadka ee la ansixiyay.

2. Inta aan ka ahayn Xafiiska Hantidhawrka Guud, Wakaaladaha/Shirkadaha Maamulka ee kasta waa in ay diyaariyaan sannad walba xisaab-xir waafaqsan shuruucda xisaabaadka laba (2) bilood kadib dhammaadka sannad maaliyadeedka una gudbiyaan Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhawrka Guud. Xafiiska Hantidhawrka Guud waa inuu diyaariyaa una gudbiyaa xisaab-xirkiisa Golaha Dhexe iyo Hogaamiyaha Maamulka isla xilligaas loo qabtay Wakaaladaha iyo Sharikadaha Maamulka qodobkan ku xusan. Qaabka loo diyaarinayo xisaab-xirkaas waxaa lagu qeexayaa xeer-nidaamiye ka farcamaya Xeerkan.

Qodobka 54^{aad}

Lacagta Dheeriga ku ah Wakaaladaha iyo Sharikadaha Maamulka

1. Iyadoo la xiganayo Xeerka lagu aasaasay Wakaaladda ama Sharikadda, Xoghayaha Maaliyadda oo la tashanaya Madaxda sare in ay amraan Wakaaladda ama Sharkadda ay Maamulka usoo gudbiyaan wixii lacag ah oo u soo xerooday dheerina ka ah baahidooda sannadkaas.
2. Lacagtaas ay soo gudbiyaan Wakaaladaha iyo Sharikadaha waxaa lagu darayaa dakhliga Maamulka ee sannadkaas.

QAYBTA 10^{aad}

HANTIDA MAAMULKA

Qodobka 55^{aad}

Hantida Maamulka SSC-Khaatumo

1. Ma jiro qof ku yeelan kara Hantida Maamulka qoraal ama xeer sidoo kale ma jiro qof bixin kara.
2. Hantida Maamulka SSC-Khaatumo waxaa lagu maamulayaa sida ay danta ku jirto Maamulka SSC-Khaatumo Soomaaliya.
3. Marka laga reebo sida uu caddeeyay sharci kale, hantidda Maamulka SSC-Khaatumo ee loo qoondeeyay adeeg gooni ah ee Maamulka waxaa maamulaya masuulka adeegaas.
4. Xoghayaha Maalliyada waa inuu joogteeyo sidoo kale cusbooneysiyo diiwaanka Hantida maguurtadda ah.
5. Xisaabiye kasta ee jooga hay'adaha Maamulka waxa uu masuul ka yahay Hantida Maamulka uu xil saran yahay.

Qodobka 56^{aad}

Hantida Kale Ee Maamulka SSC-Khaatumo

Hantida soo socota waxaa leh Maamulka SSC-Khaatumo:

1. Hantida ma guurtada aysan cidna laheyn.
2. Kheyraadka macdanta.
3. Deegaanka iyo hubka ciidanka.
4. Dhismayaasha Maamulka SSC-Khaatumo ay ku shaqayso, uga faa'iideysato xafiis ahaan, ama ku qabsato adeegyada.
5. Hanti kasta ama lahaanshaheeda uu Maamulku ku yeelatay sida sharcigu qabo, dhaxashay ama la wareegtay, hadiyad ahaan loo siiyey, iib ama wareejin.

CUTUBKA 11^{AAD} XAYIRAADAHA

Qodobka 57^{aad}

Masuuliyad-Maaliyadeedka Shakhsiga ah ee Sarkaalka Idman

1. Xadgudub kasta ee Xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa waxay keenaysaa ciqaab sida ku xusan xeeraka maamul iyo xeerarka denbiyada.
2. Nooca Ciqaab ee xadgudubka Xeerkan inuu noqdo ciqaab maamul ama mid denbi waxay ku xirnaanaysaa denbiga ama khaladka la galay inuu yahay; sharci jebin, khalad yar oo dhacay ama denbi wayn.

Qodobka 58^{aad}

Soo-celinta Lacagta kharash bixin si Khalad ah ku Baxday

1. Sarkaalka idman ee kasta oo Hay'ad Dowladeed waxa laga rabaa in uu diiwaan geliyey oo hayo lacagta habka qaldan ku baxday sida ay qabaan Xeer-nidaamiyeyaashu.
2. Sarkaalka idman ee Hay'ad kasta ee Maamulka waa in uu qaado tallaabooyinka ku haboon ee dib loogu soo celinaayo dhammaan lacagihii ay lahayd Dowladdu oo qandaraasluhu si khaldan u qaatay isaga oo aan gudan ama aan dhammaystirin waajibaadkiisii shaqo iyo hawshii lagula heshiiyey ama si khaldan ku qaatay lacag dheeraad ah.
3. Haddii qofku yahay mid aan bixin deyn aan cashuur ahayn oo Dowladdu ku leedahay;
 - a. Qofkaas waa laga joojinayaa in wax laga iibiyo mudo aan saddex sano ka badnayn si waafaqsan Xeerka Iibka Maamulka.
 - b. Sarkaalka Idman wuxu samayn karaa in uu deymaha taagan ku wargeliyo Xafiisyada soo-celinta qaamaha u qaabilsan Maamulka, wuxuu sidaas oo kale ku dalaci karaa khidmada adeega iyo ganaaxyada dul fuulay deynta, iyo heshiiskii lala galay kuwa qaamaha deynta ee gaarka loo leeyahay; iyo;
 - c. Hay'adda Maamulka arrinku khuseeyo waxa ay laali kartaa ama kala noqon kartaa shatigii iyo fasaxii shaqo si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 59^{aad}

Dembiyada iyo Ciqaabaadka

1. Ku xad gudubka Xeerkan ama xeer-nidaamayaasha ka farcama ama la xiriira, waxaa lagu muteysanayaa ciqaab waafaqsan Xeerka Maamulka iyo Xeer Ciqaabeedyada Dalka.

Cadeymaha Diwaangelinta Danabaysan

1. Oggolaanshaha macluumaad kasta ee ku saabsan Maareynta Maaliyadda Danabaysan ee lagu macaamilo oo laga dhex helo Nidaamka Maaraynta Maaliyadeed ee Maamulka, haddiiba loo soo bandhigo habka dokumentiyada, ama kombiyuutar lagu daabaco, ama la keeno nuqul warqad ku daabacan, lagu sawiray film-yaraha (micro-film), ama lagu kaydiyey floppy ama hard disc, ama la adeegsado qaab kasta oo kale ee warbaahinta elكتروoniga ah, macluumaadkaas oo dhan waa in caddaymaha laga aqbali karaa Maxkamad kasta horteeda ee macaamilka Maaliyadda ay u aragto in ay la xiriirta.
2. Sawirro muuqaal leh sida filim, filim-yare(microfilm), microfiche ama muuqaalada kombiyuutarka ee qoraalka ama waraaqo asal ah sida jeegag, xawilaadda lacagta elكتروonig ah, ama aalad kasta oo lacag lagu bixin karo ama daftarka/diiwanka xisaabaha, waxa loo aqbalayaa sidii caddaynta asalka ee loo daliishan karo lana xirriirta arrin ama macaamilka maaraynta maaliyadda, sidii oo ay tahay caddayn sugan oo markhaati la dhaariyey leh
3. Tilmaamaha kharash-bixinta, farriimaha iyo wareejinada lacagaha la bixiyey, ee nidaamka la mariyey, lana fuliyey iyada oo la adeegsanayo qalabka elektroniga ah oo ay ka mid yihiin saxiixyada habka elektaroonigii waxa loo aqbalayaa sidii caddaynta asalka ee loo daliilshan karo lana xirriirta arrin ama macaamilka maaraynta maaliyadda ama xisaab u diiwaangashan, sidii oo ay tahay caddayn sugan oo markhaati la dhaariyey leh.
4. In lagu qoro Diiwaanka Xisaabaadka, buugga lacagta iyo buuggaagta kale ee xisaabaadka ee miisaaniyadda hay'ad kasta ama gacan ha lagu qoro ama kumbiyuutar ahaan ha loo geliyo waxa loo aqbalayaa;
 - a. Sidii caddaynta asalka ah ee loo daliilshan karo lana xirriirta arrin ama macaamilka maaraynta maaliyadda,
 - b. Sidii ay tahay in uu bixiyey caddayn sugan oo markhaati la dhaariyey leh oo Sarkaalka Idman ama saraakiisha kale ee miisaaniyadda Hay'adda leh,
 - c. sidii in la caddayn karo Diiwaanada gacanta ama kombiyuutarak lagu qoray, buugga lacagta iyo buuggaagta kale ee Xisaabaadka in ay yihiin ama ahaayeen buugaagtii xisaabaadka ee asalka ah ee missaniyadda ama xisaabaadaka Hay'addas;
 - d. sidii oo kale in qoraalkooda loo geliyey Diiwaanada sidii caadiga ahayd ee waafaqsan hawl maalmeedkooda, iyo in ay buugaagtu yihiin ama si toos ah uga imanaya cidda masuulka ka ah miisaaniyadda iyo xisaabaadka Hay'addaas.

Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga

Dakhliga kheyraadka dabiiciga ah waxa ku jiri doona dhammaan dakhliyadda Maamulka ka yimaada shatiyadda, Canshuuraha, ama ka faa'iidayso kastoo kale ee kallumaysiga, macdanta iyo kheyraad betroolka.

Aruurinta iyo keydinta dakhliga Khayraadka Dabiiciga ah

1. Dhamaan dakhliga kheyraad dabiiciga ah ee lasoo ururiyay waxaa lagu keydinayaa Khasnadda Maaliyadda Mideysan ee Bankiga Dhexe.
2. Xisaab hoosaad gaar oo la hoos geeyo hal khasnad xisaabeed oo ah lacaga ka soo xarooda dakhliga kheyraadka dabiiciga ee ka yimaada nooc kasta ee kheyraadka dabiiciga.

Wadaagga Kheyraadka Dakhliga Dabiiciga

1. Wadaagga dakhliga ka yimaada kheyraadka dabiiciga waa in la raaco si waafaqsan heshiiska wadaagga dakhliga ee ka dhexeeya Maamulka SSC-Khaatumo iyo Dawlada Federaalka soomaaliya, ka dib marka la dhamaystiro xeerarka wadaaga dakhliga kheyraadka dabiiciga ah.

Warbixinada Xisaabta Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga

1. Xisaabiyaha guud waa;
 - a. In uu keydiyaa buugaagta xisaabta iyo diiwaanada xisaab-hoosaayda dakhliga khayraadka dabiiciga iyo;
 - b. In uu u gudbiyo Xoghayaha Maaliyadda iyo Hanti Dhawraha Guud warbixinada Maaliyadeed ee rubuclaha iyo sannadlaha.
2. Xoghayaha Maaliyadda waa in uu diyaariyo una gudbiyaa Golaha Dhexe warbixinta sannadka dhammaan kharashka laga saaray xisaab hoosaadka dakhliga kheyraadka dabiiciga ee sannad Maaliyadeedkaas.
3. Xoghayaha Maaliyadda waa in uu siiyo warbixin faah faahsan oo 3 bilood ah Hogaamiyaha oo ku saabsan dakhliga soo galay, Kharashka laga bixiyey iyo wixii harsan oo ku dheeli tiran xisaab hoosaadka dakhliga kheyraadka dabiiciga ee ku jira Khasnadda Guud (Treasury Single Account) oo ay ka mid yihiin haraa kasta ee qoondada dhigaalka dakhliga kheyraadka dabiiciga iyo maalgelintooda.

4. Xoghayaha maaliyadda SSC-Khaatumo iyo Wasiirka Maaliyadda Dowladda federaalka waxay si sanadle ah isula wadaagayaan warbixinta khayraadka dabiiciga ah ee dalka.

Qodobka 65^{aad}:

Keydinta Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga

1. Xoghayaha Maaliyaddu waa in uu soo saaro qawaaniin maaliyadeed oo waafaqsan Xeer nidaamiyayaasha Xeerkan hoos yimaadda oo qeexaya qeybsiga dakhliga kheyraadka dabiiciga ee sannad Maaliyadeed kasta lana caddeeyo qoondada dhigaalka ay tahay in la keydiyo.
2. Awaamiirta Maaliyadeed ee kor ku xusan waa in ay ka wada heshiiyaan Dowladda Federaalka iyo maamulka SSC-Khaatumo .
3. Keydinta kor ku xusan waa in maalgelin lagu sameeyo si waafaqsan siyaasadda maalgelinta ee dakhliga kheyraadka dabiiciga ee uu soo saaray Xoghayaha Maaliyaddu marka uu la tashado Dowladda Federaalka iyo Guddiga la talinta Maalgashiga ee heer Federaal iyo Heer Maamulka SSC-Khaatumo.
4. Siyaasadda maalgashiga shuruudaha looga baahan yahay sida ku xusan farqaddan waxa loo fiirinayaa in aysan halis gelineyn degenaashaha dhaqaalaha guud ee dalka.
5. Maamulka SSC-Khaatumo ayaa go'aan ka gaari kara qorshaha maalgashiga baaxadda leh ee kaabayaasha lagana maalgelinayo keydka dakhliga kheyraadka dabiiciga ee ay qayb ahaan u helaan laguna qoondeeyaa Miisaaniyadda Maamulka ee uu Golaha Dhexe oggolaaday.

QAYBTA 13^{AAD}. QODOBADA GUNAANADKA XEERKA

Qodobka 66^{aad}:

Burin

1. Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan.

Qodobka 67^{aad}:

Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu ansixyo Golaha Dhexe, Hogaamiyaha Maamulka SSC-Khaatumo saxiixo laguna soo saaro faafinta Rasmiga.